

XILKAS-XUMO



BUUGGA

XILKAS-XUMO

2023

Xasan Nuur



XILKAS-XUMO

XILKAS-XUMO

Xasan Aadan Xasan (Xasan Nuur)

XUQUUQDA BUUGGA

Xuquuqda © *Xasan Aadan Xasan (Xasan Nuur)* 2022 Akhriste waxaa lagugu wargelinayaa oo aan kaa codsanayaa in aadan qaadan karin qayb kamid ah, sidoo kale aadan daabacan karin, koobiyeyn karin, turjumi karin, adigoon ogaalasho buuxda ka haysan qoraaga buugga.

Fadlan ixtiraam xaquuqda qoraaga buugga, hadaad u baahato kala soo xariir:

Email: hassannoorstar@gmail.com

XILKAS-XUMO

TUSMADA BUUGGA

Hibeyn.....	6
Mahadnaq.....	7
Afeef.....	8
Hordhac.....	9
CUTUBKA:1AAD.....	10
Guurka.....	11
Gabar waa guur doon ama xoolo doon.....	12
Guurka waa saddex.....	13
Xaqiiq jirta.....	15
Unugyada guurka.....	17
CUTUBKA:2AAD.....	21
Balwada iyo saaxibka xun.....	22
Waa maxay balwad?.....	22
Sheeko xikmad leh: Aabbo, wiil iyo dameer.....	23
CUTUBKA:3AAD.....	24
Cuqubo waalid.....	25
Xanaanneynta waalidka.....	26
33 Nasteexo oo ku saabsan la qaabka loola dhaqamayo Waalidka.....	34
Sheeko cuqubo waalid.....	40
Duluucda sheekada.....	41
CUTUBKA:4AAD.....	42
Barbaarinta.....	43
Xaaalada furriinka.....	44

XILKAS-XUMO

Masuuliyad wadareed mise keli daryeele.....	44
Haddaan heshiis dhalan.....	45
Xuquuqda carruurta.....	45
Danta ilmaha ayaa ugu muhiimsan.....	47
Ilmuhu waa ka qaybqaadan karaa.....	47
Kutarbiyenta carruurta salaadda.....	48
Talooyin Wax Ku Ool Ah Oo Ku Saabsan Barbaarinta Caruurta.....	51
Dhaawicidda Mooraalka Caruurta Iyo Dhibaatooyinka Ay Ka Qaadaan!.....	56
Sheeko:Caawinaad ilmaha caqabada neerfo maskaxeedka.....	58
CUTUBKA:5AAD.....	60
Masuuliyada.....	61
Waa maxay masuuliyad?.....	61
Masuuliyada waalidka.....	63
Waa maxay masuuliyada ardaydu?.....	65
Musuqmaasuq.....	66
Dhibaatooyinka musuqmaasuqa.....	67
Codsi.....	68
Gunaanad.....	69

XILKAS-XUMO

XILKAS-XUMO

HIBEYN

Buuggan oo uu magaciisu yahay, **XILKAS-XUMO**, waxaan ku sharfay, kuna maamuusay una hibeeyay dhammaan umadda soomaaliyeed meel kasta dunida ka joogaan Dal iyo Dibadba.

XILKAS-XUMO

MAHADNAQ

Ugu horayn mahad oo idil waxay u sugnaatay alle swt oo inaga yeelay ummad muslimiin ah rumeysan alle, adeecsan rasuulkii loosoo diray ,allihii koon-kaan ina keenay ,nakala garad siiyey xaqa iyo baadilka, nasiyey awood an wax ku qabsano, maskax aan ku fakerno caqli iyo karti aan ku kala saarno samaanta iyo xumaanta.

Marka xigta waxaan mahad balaaran u jeedinayaa waalidkey oo aan la'aantood ifka imaan lahayn, waalidkii alle Kasakoow sababta u ahaa inaan waxbarto, inaan

bulshadayda wax taro waalidkii igu soo abaabshay wadada wanaagsan, markastana igu dhiiri gelin jiray waxbarashada.

Intaas kedib waxaan halkaan mahad celin uga dirayaa dhamaan walaalihii iyo asxaabtii gacanta wayn ka geystay buugaan oo runtii la'aantood ay adkaan la hayd inuu soobaxo.

Waxay mudan yihiin abaal weyn iyo duco badan, dhabahaantii waxay isugu jiraan walaal, ehel, asxaab iyo kuwa kaloo badan.

Ma ahan mid aan sookoobi karo oo aan ku idleyn karo qalin iyo qoraal. Waxaan ka afeefanayaa guud ahaan inaysa ii suuro geyleyn inaan magacyadooda wada xuso, balse qalbiga ayey ku wayn yihiin.

Waxaan u mahadcelinayaa dhamaan asxaabtii dhiirigelinta iyo bogaadinta igala daalin intii ay howshani ay socotay.

Waxaan sigaara ah ugu mahadcelinayaa saaxiibada kala ah:

Dr Maxamuud Aadan Isaaq (Dr Moha Young): saaxiib buuggaan billawgiisa ilaa dhamaadkiisa aan marna garabkayga ka bixin.

Liibaan Xuseen Cabdi (Liibaan ina Buli) walaal buuggaan inta aan qoraayay igu dhiirigelin jiray,haday tahay talo siin ,haday tahay ciwaano,dhamaantood ayuu garab igu siiyay, abaalkaaga ma guudi karo eebe janadii udgooneed haku siiyo aduunkana ciso iyo sharaf ku noolow.

XILKAS-XUMO

AFEEF

Waxa aan ka afeefanayaa hadii Khalad lagu arko buuggaan dhaxdiisa, macna ahaan iyo qoraal ahaanba in aanan ugu talagalin oo ay ku dhacday si aanan ogeyn dhankastaba ha ahaatee. Waxa aan codsanayaa cid walba oo buuggeyga ku aragta khaladaad in ay ila soo xariirto si aan dib uga saxo daabacadaha kale.

XILKAS-XUMO

HORDHAC

Marka hore Illahay sw ayey mahadi oo idil u sugnaatay, oo igaransiiyey in aan bulshadayda wax kusoo biiriyo.

Marka xigtana dhamaan, walaalihii, asxaabtii iyo ehelkii igu garab siiyey soo saarida buuggaan.

Buuggaan **Xilkas Xumo** waxaan ugu talagalay bulshada soomaaliyeed

Dal iyo Dibadba halka ay ka joogaan.

Wuxuuna ka hadlayaa qeebo kala duwan sida:

- Guurka oo faaffaahsan
- Saaxibka xun iyo balwada
- Nimcooyinka alle nagu galaday
- Marxalada dhalin yaranimo
- Caafimaadka
- Cuqubo waalid iyo in kale oo ka badan oo aad ku dhex arki doonto buugga

INSHA ALLAAH

CUTUBKA 1:aad

Guurka

Guurka

Waa maxay guur ?

Guurku waa hishiis sharci diineen kufula kaa oo dhex maraya laba qof (Lab iyo Dheddig).

Guurku macnaahisu waa fal amar Waa guur oo meel ka guur oo meel kale u guur

Meelo badan ayaa laga guurayaa oo meelo badan ayaa loo guurayaa meelaha badan oo laga guuraayo waxaa ka mid ah:

- ❖ Kali ka guur oo lamaane u guur
- ❖ Dhalin yaro ka guur oo waayeel u guur
- ❖ Xilsaamad ka guur oo xilkas u guur
- ❖ Iskaabule ka guur oo xaaslay u guur
- ❖ Caruur la'aan ka guur oo caruurley u guur
- ❖ Xidid la'aan ka guur oo xididley u guur
- ❖ Lootaliye ka guur oo tashade u guur
- ❖ Jacayl ka guur oo kalkacayl u guur
- ❖ Been ka guur oo run u guur
- ❖ Xaaraan ka guur oo xalaal u guur

XILKAS-XUMO

Gabar waa guur doon ama xoolo doon

Laakiin: Gabdhaha guurku wuxuu u yahay baahi aas aasi ah, waxaana ku abuuran caadifo hooyonimo ah.

Xooluhuna waxay saldhig u yihiin baahiyo kale oo aas aasi ah sida:

- hunguriga
- hu'ga
- hoyga.

Baahiyaha aasaasiga ah midna mida kale booskiisa ma buuxin karo oo gabadha si kasta oo ay u ladan tahay, ladnaantaas u buuxin mayso kaalintii saygu u buuxin lahaa ee waxaaba hubaal ah in gabarba gabadha ay ka barwaaqo badan tahay ay guurku uga baahi badan tahay.

Dhinac kale haddii laga eego gabadhu iyada oo ladnaan dhaqaale iyo barwaaqo ku dhexjirta ayay raacdaa nin aan beerkiisa beer ka xigin; si ay marwo iyo hooyo u noqoto, waxayna ka tagtaa saygeeda hodonka ahaa haddii uu gabo qasatkii ay u guursatay.

Taa macneheedu waxaa weeye gabadhu kuma samri karto ladnaan say la'aan ah laakiin way ku samri kartaa say sabool ah.

Tan kale aadanaha dunida ku nool in yar baa maalqabeen ah, inta maalka waalidkood ka dhaxashayna way ka sii yar yihiin.

Ninku marka uu dhallinyaro yahay wuxuu qabsan lahaa, wuxuu tabcan lahaa, wuxuu guursan lahaa, wuxuu dhali lahaa kulli waa u dhimanyihiin

Majirto nin dhalinyaro ah (doob) oo Hanti leh ama tacbaday illaa uu waalidkii ugu dhinto ama waalidka oo u tacbo mooyee.

Qof walba marka uu guursado ayuu hanti yeeshaa, guurku waa raxmad Alle SWC inagu galaday.

Meesha u horaysa ee uu wax ka bilaab mayaan waa guurka haddii ninku uu masruufka shaqayn karo;

waayo xaaskiisu waa qofkii ugu muhiimsaneed ee wax la dhisilaheed oo wax ka dhigi laheed Waa tii aan horay idiinku soo wariyey: reerku seddex buu ku dhismaa:

- **Hoyiso**
- **Hayso**
- **Hinjiso.**

XILKAS-XUMO

Gabadhii guur doon ah ha guursato wiil leh diin, akhlaaq iyo dadnimo saboolba ha ahaadee; waayo ninkaan xilligii uu wax noqon lahaa hadda ayay bilow u tahay, hana ku caawiso sidii uu dhinac walba u noqon lahaa ninka koowaad, gabadhii xoolo doon ahna ha sugto mid aabbihi maal uga dhintay ama oday xoogaa haysta ha guursato.

Guurku waa saddex

1. Muran Guurso
2. Marwo Guurso
3. Malab Guurso

Muran Guurso:

Waa kolka Gabadh hadda un qaan-gaartay loo yagleelo Aqal, haddaan si kale u iraaqdo:

waa gabar 14 illaa 19-jir ah guursatay mid aan iyada waxba dhaamin xagga da'da.

Xoogaa markii la wada joogo, ayuu u bilowdaa muran iyo far isku taag, illeen waayo aragnimo iyo caqli wax lagu dhaqo ayaan jirin.

Marwo Guurso:

waa Gashaantidu marka uu Gugeedu gaaro 20 illaa 25-jir, ama kasii gudubto.

Sida ay haasaawe ugu jirto oo, marba kii guur lasoo doonaba isugu buunbuuniso, marna xujo iyo xaal adag horgeyso, ama waxbarasho iyo hiigsi kale isku howsho, ayey goor dambe baraarugtaa, misana nafteeda la hadashaa:

“Naa gablanto yee, horta goormaad adigu guursan, sowtan asaagaa gacal abuuray, oo waliba gogol la seexday, oo haddana curad gardaadshay; maxaa guur la'aan ku dhigay oo, guri aadan laheyn ku seexshay”.

Kolka ay nafteeda yara canaanato oo, xaaladda si guud u qiimeyso ayay soo yara dabacdaa, oo danta guud ka hadashaa:

“Mid i guursada, oo mar un i xira, oo Marwadiisa iga dhigta, oo maxabbo igu dhaqa, mar haddaan heli lahaa, masruuf badan kama rabeen, Minankeygaan maamulan lahaa”

Malab Guurso:

waa Carmad laba caruura ama mid haysata.

Waxay u xeyd xeydataa sidii ay caruurteeda u korsan laheyd isuguna ugu filnaan laheyd.

Markay xoogaa isugu toosto caruurtuna u koraan, ayay dib ka soo maaxataa oo istiraahdaa, “bal maad iska guursatid waa adigan gaboobaye, oo wadaad wehel kuu noqda raadsatid;

XILKAS-XUMO

Guri iyo masruufba waad haysataa, santiyada kugu haray bal ka gaarsii, labo ama mid hadduu Alle kaa siiyo”.

Malab guurso: masruuf lagaama rabo.

Waa tii hadda kahor mid dayday ahi (Guurdoon ah) ku yiri saaxiibkii: “Carmal laba caruura wadata iiraadi” isaguna ugu jawaabay:

“waa haddaan labo helo” midda koowaad isagaa isla raba!

Sidoo kale guurso kuwa aad shaqo wadaagga tihiin, asxaabta tihiin, wax isla barataan/barateen ama aad waxbarten.

"Sadaqo sokeeye dhaaftay sooma noqoto."

Guurso qof diin iyo aqlaaq ba leh guurso.

shardi ma ahan inaad qabiil ku guursato, sidoo kale qasab mahan inaad maalka iyo quruxda fiiriso.

Qofka aad naftaada siineeyso waa inuu xamili karaa culeeyska tankiisu ka badan yahay aduunyada barkeed, waa inuu gacanta ku qaban karaa ku wadi karaa dhanka jannada, waa inaad ku ilaawi kartid marxalad kastood ku jirta sida baahida iyo xanuunka.

Guurso ruux markuu kaa tagaya kuu murugoonaya markuu kuu imaadayana kugu farxaya, haa kaas guurso waa kaagi naxariista iyo jaceylkaba aad ka heli laheed.

Guurso ruux salaada kuu dardaarmaya kuuna kicinaya waqtiga dambe si aad alla u wada xustaan, guurso ruux kaa kaafin kara kurba kasta oo noolasha kugu haayso kuguna nooleeyn karo noolal farxad iyo xasilooni leh Allaah ka sokoow.

Guurso qof diin leh kaas/taas ayeey noolasha ku fiicantahay in lala wadaago

Xaqiiq jirta.

- ❖ **Ninka:** xaaskeyga wey adagtahay iney wax dhasho.
- **Dadka:** naag kale guurso maxaa ka ag haynee naag aan waxba kuu dhaleyn.
- **Naagta:** ninkeyga ilaahey amarkii wey adagtahay inuu wax dhalo.
- **Dadka:** u sabar ilaahaa idin siin doona ducada badso dhaqtar isla aadaa.
- ❖ **Ninka:** naagteyda wey xanuunsan tahay oo howlaha guriga xataa ma qaban karto.
- **Dadka:** iska fur ee mid kale guurso naag xanuunsan oo ku daryeeli karin maxaa ku falee mid yaroo caafimaadkeedu taam yahay heleysaa.
- **Naagta:** ninkeyga waa xanuunsanyahay oo shaqo ma aado bilahaan biil la'aan ayaan nahay.
- **Dadka:** usabar xanuunka ilaahaa keenaye shaqo raadso reerkana biil, asagana ku dadaal intuu ka caafimaadayo, gurigana howshiisa qabso oo naag nool iska dhig.
- ❖ **Ninka:** naagteyda wey madax adagtahay war igama maqasho wax aan ku sameyo ma aqaan.
- **Dadka:** war iska fur ee naag kale guurso.
- **Naagta:** ninkeyga wuu i dilaa wuuna i af lagaadeeyaa waliba waxba ima siiyo dhar iima gado biilkana wuu nagu yareeyaa.
- **Dadka:** usabar ilaahaa soo hadeyn doonee ilmahaagana korso waxaas wax makaa dhibayaane.
- ❖ **Ninka:** naagteyda wey cayishay oo sidi hore iima cajibiso waa areebo oo wey foolxumaatay markey caruurta dhashay, naagti quruxda badneed een guursadayba ma ahan.
- **Dadka:** iska fur ee naag ka qurxan guurso.
- **Naagta:** ninkeyga wuu isbadalay oo balwad ayuu yeeshay oo dhar qurxan oo nadiif ah ma xerto oo wuu foolxumaaday ninki qurxoonayba een isguursanayba ma ahan.

XILKAS-XUMO

- **Dadka:** usabar ninkaaga waaye hadduu foolxun yahay iyo hadduu areebay yahay xataa sidiisa ku hayso awal maa wajiga ku xeraneysay.

Maxaa mar walba nimanka loogula taliyaa in ay xaaskooda iska badalaan sida kursi dhamaaday oo loobadalaa, dumarkana loogula taliyaa in ay ku sabraan mushkiladda haysata!!

Waxa uu ninka u sabri karin ee naagta u sabar la leeyahay sidey u xamili kareysaa Waa sababta dumar badan ayagoo kalabar cumrigooda gaarin ay u duqoobaan murugta iyo nolosha adag ee u sabar la leeyahay ayaa da' aysan gaarin gaarsiinaysa oo xanuun aan lala dareemeyn ku abuurta Intey bulshadeena sidaa u fikireyso horumar gaarimayno.

Unugyada Cuurka

Guurka waa unnuga iyo aasaaska ugu horeeyo ee qoyska, bulsha kasta oo ku nool degaan gaar ah waxa eey leeday xeer iyo caadooyin guur oo u gaar ah, kuwaas oo eey ka dhaxleen jiilkii iyaga ka horeeyay. Hadaba lbulshada soomaaliyeed waa bulsho leh hiddo iyo dhaqan u gaar ah . Sidaa darteed waxa eeynu ka hadli doonaa guurkii iyo hasaawahii soomaalida inaga oo tilmaami doona waagii hore siyaaabaha uu guurku ku imaanjiray iyo nooca hasaawe ee bulshadii hore.

Inta badan guurka somaliada waxa uu ku imaanjiray shan siyaabood oo mid waliba ka koobanyahay labo qeeybood kuwaas oo eey iskugeeyntoodu noqoneeyso tobankan nooc:

1- Guurka tooska ah, guurka noocan ah waxa uu kala qeeybsamaa laba qeeybood oo kala ah:

Dhaadasho: waa marka gabadha iyo wiilka iyaga oo yaryar waalidkood isugu dun xidhaan, guurka noocan ah aad ayuu u adkaa oo dhibaatooyin badan ayaa lagala kulmi jiray taasi oo sabab u aheeyd marka wiil iyo gabadh aan isgaraneeyn isna dooran guri isugu yimaadaan.

Gaadasho: waa xulasho uu sameeyo ninka guur doonka ah. Isaga ayaa raadsanjiray lamaanahiisa, waxa uu tafaha u xidhanjiray sidii uu ku baran lahaa gabadh karti iyo bilic leh. Waxaase xusid mudan in hidda raacu ahaa sheeyga ugu muhiimsanaa ee uu ku xusho ninka ooridiisa. Waayo inanta hooyadeed iyo isirkeeda ayaa lagu cabiri jiray shakhsiyadeeda iyo dhaqankeeda.

Inanka guurdoonka ah inta uusan u baqoolin xulashada gabadha uu nolasha la wadaagayo waxa uu talooyin iyo duruus wax ku ool ah ka qaadan jiray odayaasha deegaankiisa maadaama eey arinkaan kaga khibrad badanyihiin.

XILKAS-XUMO

Wiil guur doon ah ayaa hada ka hor waxa uu ka talo weeydiiyay nin oday ah in uu kala taliyo gabdha uu nolasha la wadaagayo astaamaha uu ka eegaayo. Ninkii odayga ahaa waxa uu yiri oo uu talo ahaan ugu soo jeediyay inankii sidan “gabadha aad guursaneeyso waa in eey lahaataa shantan sifood:

Waa in eey lahaataa Itaal nimeed, Aqbal dumar, Af-muslim, Anshax culumo iyo waa in eey ahaataa arinkeen waayeel”

Marka ninku uu qeeyb kamid ah tilmaamahaas uu ka helo gabadha ayuu guursan jiray. sidaa si lamid ah gabdha gashaantida ah inanka eey dooraneeyso waxa eey ka eegi jirtay dhinacyo badan oo eey kamid yihiin: raganimadiisa geesinimadiisa, deeqsinimadiisa, aftahanimadiisa iyo hantida reerkooda., balse sheeyga ugu muhiimsan ee eey gabdhuhu ka eegi jireen waa raganimada.

Bal aan soo qaadano qiso inoo bayaamin karto waxa eeynu ka hadleeyno gabadh baa hada ka hor waxa eey la sheekeysatay labo nin, mid waliba wax gooni ah ayey ku jeclaataay. Waa midka koowaadee waxa eey ku jeclaataay raganimadiisa, waxa uu ahaa nin karti badan. Kan labaadna waxa eey ku jeclaataay hanti iyo maal. Iskama waaline sidii caadada aheeydba waxa eey la tashatay gabdh kaga khibrad badan arimahan oo iyada kaga horeeysay. Waxa eey weeydiisay weeydiintan.

Nin rag ah iyo nin reer maare leh ayama la raacaa? Waxa eey ugu jawaabtay tallo ahaana usiisay “isagaa rogrogayee nin rag ah baa la raacaa”.

2- Boob: guurka nuucan ah sida magaciisaba ka muuqato waxa uu ku imaaan jiray sifo qalafsan oo ah in lagu guursado gabadh si khasab ah ama iyada oo eeysan qooyso kooda raali ka aheeyn. Waxaana loo qeeybiyaa labo qeeybood oo kala ah:

Latagis: guurka latagis waxa eey aheeyd in wiilku intuu gabadha si qarsoodi ah ula heshiiyo uu dabadeedna la tago reerkoodii marka uu geeyo gurigooda aad baa loo soo dhaweeyn jiray inanta dabadeedna waxaa innanta reerkoodii loo hibeeyn jiray xoolo si looga helo ogalaashiyo waalidkeed.

Dhabar garaac: mararka qaar waxaa dhici jiray in wiilka xoog ku kaxeeysto gabadha. isaga oo aan nafteeda iyo reerkooda intaba aan ogalaasho ka heeysan. Asbaabaha ugu weeyn ee keeni jiray waxaa kamid ahaa in gabadha labo nin isku heeyso oo uu mid weliba isaga doonayo in uu guursado. Arintan waxa eey kamid aheeyd waxyaabaha colaada huriya. Waxaase xusid mudan in guurka nuucan uu

XILKAS-XUMO

markiisii horeba bulshada uusan ku badneeyn hadana uu ka dabar go'ay dhamaan deegaanada soomaalidu dagto inta ogaalkeeyga ah

3- Dani kubaday: guurka nuucan ah waa mid eey geeridu keento. Waxa uuna u qeeybsamaa noocyadan.

Xigsiin: marka ninka ooridiisu geeriyooto ayaa la siin jiray walaasheed. u jeedada ugu weeyna waxa eey aheeyd in eeysan caruurtu dayacmin oo eey habaryartood xafido waxa eeyna ku khasbaneeyd in eey aqbasho arintan dhaqanku jideeyay oo waa tii layiri xigsiino xulasho maleh.

Dumaal: dumaashu waxa eey cagsi ku tahay xigsiinta oo waa marka uu ninku dhinto ooridiisana waxaa guursan jiray walaalkii. Ujeedaduna waxa eey kala simantahay xigsiinta.

4- Sahan dumar: Waa marka gabdha eey u bareerto in eey guurka iyada lugaheeda ku raadsato waxaa loo qeeybiyaa labadan nooc oo kala ah:

Heerin: Waa socdaal guurdoon ah oo eey sameeyaan gabdhaha weeynaada ee guurka ka daaha. Waxa eey socdaalkooda ku mari jireen deegaanada ka durugsan deegaankooda. Reerkii eey soo martiyaanba waxa uu fahmi jiray in eey gabdhahu guur doon yihin. sidaas darteed waa la soo dhaweeyn jiray. Lagamana nabsi geli jirin oo rag aan laheeyn oori ayaa guursan jiray.

Gayaan doon: gayaan doon waa marka eey gabadha inta eey soo dhax fadhiisato guriga ninka eey dooneeyso iyada oo aan ka cabsaneynin xaasaska ninka eey dooneeyso si barer ahna eey carabka ugu adkeeyso iyada usheegeeysa in odayga xaafada eey u fadhiso dhinacna eeysan u dhaafeeyn ilaa uu ka mehersado.

5- Bogsiin: Bogsiintu waa guur inta badan hadafkiisu ahaa in lagu qaboojiyo colaad dhaxtaalo labo beelood ama lagu xoojiyo nabada beelaha isku deegaanka ah.

XILKAS-XUMO

Godobreeb: waa nooc kamid ah bogsiinta waana marka beelo eey is weeydaarsadaan gabdho si loo dhayo boogaha iyo dhawacyo eey isu geeysteen nabadna loo dhaxdhigo beelaha horary isu diriray. Labo col oo aan isbixin jirin baa hubka lagaga dhigaa Waa tii horey loo yiri “meel xinjiri taalo xab hayaalo”.

Marka eey dhacdo in gabadh la faraxumeeyo ma jirin xabsiyo lagu ciqaabo dambiilaha falkaas geeystay. Dantu waa dabar addag oo cadowgaaga ayeey lugaha kaaga xirtaa waxaana dhici jiray in dambiilahii falkaa geeystay lagu daro gabadha iyagoo oran jiray quruxdeedii wax u dhintayee qadaadkeey kuu saarantahay. waa sababtaas mida keentay in dambiilihii ku gaboofalay gabadha eey u dhaxdo oo eeey oori u noqoto.

Hasaawahii soomaalida waxaa saldhig u ahaa ciyaaraha oo ahaa aaladda fududeeyn jirtay hasaawaha. Waxa eeyna ahaayeen munaasabada ugu weeyn eey dhalinyaradu ku kulmi karaan iskuna baran karaan. Ciyaaraha dhaxdooda lama tiraabi jirinee tix baa la isku sarbeebi jiray intaa marka la is dhaafsado habeenkuna gabala rito ciyaartuna dhamaato ayaa gees la isula bixi jiray sheekadana gunta loo dhigi jiray . Dhaqan xumida iyo gaabsi yarida bulshadeena waa Ku ugubee, milggihii iyo dhaqankii soo jireenka ahaa waxa uu ahaa in arintu guur Ku ekaato. Goobta reerku yaalana la isuraaciyo.

XILKAS-XUMO

CUTUBKA2:aad

Balwada iyo Saaxiibka Xun

Balwada iyo Saaxiibka Xun

Waa maxay Balwad?

Balwadu waa wax naftu la qabsatay oo ay mudo ku celceliso sida magaca ku cad waa BALWAD waana waaxaad muddo wadid. Balwadu waa laba nooc

- Balwad fiican sida isboortiga, wax akhrista iwm
- Balwad xun sida cabida sigaarka, qaadka iwm.

Balwada xun waa mid ka mid ah asbaabaha waa weyn ee kuu diidan inaad noloshaada isbadal lataaban karo ka gaadho.

balwada xun waa shay si dhibyar lagu bilaabo laakiin ay adagtahay in la iska deeyo.

Hadaba si aad hiigsigaaga iyo himiladaada u gaadho iskaga fogaaw balwad xun sameysana balwad fiican taas oo horumar aad ku gaadhaysid.

Faa'iido darada balwada xun

- Naftaada ayay waxyeelaysa xaga caafimaadka
- Wakhtiga ayaad ku luminaysaa
- Dhaqaalahaaga ayaa hoos u dhigaysa
- Hadaafkaaga ayay caqabad ku noqonaysaa.
- Waxay kaa dhigaysaa mid gabo kaalintiisi bulsho.

Dooriga tubaakadu adeer waa wax kuu darane

Dabkan aad cuntiyo qaacu wow daanno feeraha e'

Sidii daamur buu kaaga dhegin daabka xuunshade e'

Dibnaha iyo afkaa waxay ku noqon dagal haruushada e'

Daqayada ma naaxaan nin cunay shay darooga lehe

Abbateydka iyo wuxuu kaa dilaa gaajo diidaha e

Waxay duubiyadu kuu ekaan diriq sidiisiye

Diif iyo xanuun baad u tahay dagaanti maandhow e`

- Abwaan cabdirisaaq xirsi suldaan

Sheeko xikmad leh: Aabbo, wiil iyo dameer

Bari waxaa is raacay aabo iyo wiil uu dhalay waxayna wada fuuleen dameer si ay suuqa ugu tagaan horay Markaay muddo wada fuushanaayeen ayaa waxaa ka soo hor baxay niman. nimankii ayaa ku dhaga hadlay oo ku yiri “waa maxay labadan doqon ee dameerka miskiinka ah laba kuwada fuushan” odaygii ayaa isla markiiba ka dagay dameerka oo hogaanka u qabtay si uu wiilkiisa ugu wado markuu cabaar ku waday ayaa waxaa ka soo horbaxay gabdho.

Gabdhihiina waxeey ku yiraahdeen “bal eega wiilkan doqonka ee aabihii ka wayn lugaysinayo isaguna dameerka fuushan.”

Intaas ka dib wiilkii ayaa ka soo dagay dameerka odaygii ayaa koray dameerkii. markaay muddo socdeen waxaa la kulmay dhalinyar dhalinyarradiina waxaay ku yiraahdeen “waligeen maanan arag odaygan oo kale wiilkiisa yar lugeeysiinayo isaguna dameerka fuushanyahay.”

Odaygii ayaa ka soo dagay dameerkii wiilkiisana u sheegay in labadooduba ayna wada korin.

Dameerkuna kaligis u socdo markay muddo saddexdooduba isgarab socdeen ayaa waxaa ka soo horbaxay odayaal. odayaashii ayaa hadana ku dhago hadlay oo ku yiri “waa maxay dadkan aan garanaynin sida dameerka loo isticmaalo.”

Markii ay suuqi soo gaaraan oo ay fadhiisteen ayuu wiilkii yaraa aabihii waydiiyay “aabo maxay dadku wax in ooga sheegayeen?”

Odaygii ayaa ugu jawaabay “wiilkaaygi aan jeclayoow waxaan ku barayay cashirka nolosha ugu mihiimsan kaasi oo ah hadii aad istiraahdo dadka wada qanci ama raaligali aadan raligalin Karin.

XILKAS-XUMO

CUTUBKA3:aad

Cuqubo waalid

Cuqubo waalid

Marka aan ka hadleeno cuquubada waalidka wey macno badan tahay qof welibane waxa uu qeexitaankeeda u adeegsadaa hadba qofka sida uu u fahansan yahay aniga oo qeexaya ereyga ah cuquubo waalid waxa aan Oran karnaa

Cuquubada waalidka Waa in aad ka soo baxdaa boos ama meel uu San Waalidkaa kaa fileenin oo uu isla mar ahaantaana kaa naxaa.

Waxaa kale oo aan dhihi karnaa cuqubada waalidka waa in uu ku habaaraa ama uu ku inkaaraa waalidkaada cuqubada wey wejiyo ama noocyo badan tahay waalidka oo keliya lagama qaado cuqubada waxaa kale oo laga qaadi karaa bulshada aad ku dhex nooshahay hadaan

Waana nooca labaad ee cuquubada.

tusaale u soo qaadano sida cuqubada looga qaado bulshada

Waxaa looga qaadi karaa in bulshada aad ku dhex nooshahay aad ula dhaqantid si aan munaasab ahayn marka aan Lee yahay si aan munaasab aheyn waxaan kala jeedaa in aad bulshada xuquuqdooda duufasatid in aad xaqooda garab marisid ok aad adiga afka u dhigatid.

Nooca saddexaad ee cuquubada waxaa laga qaadi karaa bahaahinka (xayawaannadda) saan ogsoonahay bahaahinka ama xayaawanka sida aad u taqaanidba waxa ay lee yihiin xaq iyo xaquuq oo hadaad ka soo bixi weyso aad ciqaab aad ku mudaneysid eebbe weyn aktiisa.

Tusaale waxaa jirtay haweeney inata ay bisad soo qabatay ku xirtay guriga waxa ayna ka goosay baadka iyo biyaha bisaddii waxa ay la geeriyootay macluul (gaajo) darteed haweeneydii waxa ay ku mudatay cadaab.

Xanaanneynta Waalidka

In badan waxaad arkaysaa waalid badan oo ka cabanaya awlaadooda, waxayna dhahayaan waa caasiyiin, wax nama taraan, nama soo xiriiriyaan, waa nagu afceliyaan iyo ereyo lamida. Waalidku waxa uu kaaga baahan yahay xanaanayn badan, taakuleyn, latacaalid xaaladdiisa caafimaad, daryeelid dhan walba ah, ka fekeridda cunadda uu cunaayo, waxa uu jecelyahay iyo waxa uu necebyahay.

Waalidku iyagaa usabab ahaa in aad adduunka timaado Alle ka sokow, iyagaana intaan ku soo leekeeyay, iyagaana dhib iyo rafaad kula soo maray adoon aan dad ahayn, jirin, waxna aqoon.

Kawaran haddii aad markii ay ku koriyeen, wax ku bareen, qof muqdar ah noqotid, haddii meeshaad uga abaalgudi lahayd ugu beddesho waalid caasi iyo in aadanba eegin. Ma ogtahay qofka soo gaara labadiisa waarid oo ka duceysta, una samafala, daryeela in uu janada Eebbe galaayo. Balse ruuxii soo gaara haddana aan ka faa'ideysan in laga dheereynaayo naxariista Eebbe.

Ila eeg xadiisgaan, wuxuu yiri Nabigu (NNKH), Saddex ruux Illaahay Kuma eego naxariis maalinta qiyaamaha, waxaa la yiri: Waayo Rasuulkii Allow?

Wuxuu yiri: Ruuxa ku caasiyooba labadiisa waalid, naagta ninka iska dhigta iyo dayuuska. Ma nahay dad garan kara xaq ay nagu leeyihiin Waalidkeen? Su'aashu waa maya ma nihin, waayo waxaad arkaysaa dad badan oo Soomaali ah oo dhahaya maxaa naga galay duqda ama duqa?

XILKAS-XUMO

In badan waxaad arkaysaa waalid badan oo ka cabanaya awlaadooda, waxayna dhahayaan waa caasiyiin, wax nama taraan, nama soo xiriiriyaan, waa nagu afceliyaan iyo ereyo lamida, maxaase keenay arrimahaan oo dhan?

Ma naga mudanyihiin waalidkeen in aan saas dhahno, Bil xaqiiq ruuxii aan ka faa'ideysan ducada iyo xanaanaynta labadiisa waalid ama midka uu soogaaro isaga oo caafimaad qaba in uu la kulmaayo ciqaab adduun iyo mid aakhiro. Alle ayaan ka magan galnay ciqaabta ka dhalata waalidka oo aan loosama falin baarina loo noqon.

Wuxuu yiri Nabigu: Labo Illaahay waa soo dadajiyaa (Cuquubadooda) xadgudubka iyo waalid caasiyidda.

Waalidka oo la caasiyaa waxaa ka dhalata dhibaato aad uweyn, Alle waxaan ka baryaynaa in uu na fahansiiyo xaq waalidka, hana naga dhigo kuwii guta Maba gudikarnee xaqoodee. Ruux aan waalidkiisa aan ka fekerin, daryeelin, liida, ka sooqaada waxaan jirin, caaya, aflagaadeeya, yiraahda duq baatihiin, wax aad gudaan ma jiraan. Maxaa u dambeyn doona ruuxaas, bal ila eeg xadiiskaan?

Nebigu (NNKH) wuxuu yiri: Saddex Eebbe kama aqbalo faral iyo sunne midna, Qofka caasiya waalidkiis, qofka abaalka sheegta iyo qofka qadarta beeniya.

Werin kale waxay leedahay (Naclad haku dhacdo ruuxa caasiya waalidkiis, Illaahay ha lacnado ruuxa caaya Aabbihii, Illaahay ha lacnado ruuxa caaya hooyadi. Alle ayaan ka magan galnay naclad, Allaahu akbar, haddaba haddii aan ogaanay in waalidka oo lacaayaa, oo aan loo samo falin ay ka dhalankarto dhibaato aad uweyn, miyay san nala habooneyn in aan iska dhaafno, kana fakerno sidii aan uga duceysan lahayn waalidkeen.

Waan hubaa ruuxii Alle ka baqa, waaridkiisa ka duceysta, dhib iyo rafaad ka ilaasha, daryeela, waajibka lagu leeyahayna guta in uu galaayo janada Eebbe.

Samafalida Waalidka

XILKAS-XUMO

Usama-falidda waalidka waa mid waajib ah lagana rabo qof kasta oo muslim ah, oo doonaya in uu liibaano adduun iyo aakhiroba. Waxaa lagu galaa jannadda Eebbe , wanaag usamaynta iyo barbaarinta labada waalid. Wuxuu yiri Rasuulkii Allaah; Waxaa halaagsamay, waxaa halaagsamay, waxaa halaagsamay qof soo gaaray waalidkiis mid ka mid ah ama labadooda oo aan janno ku galin.

Waxay sabab kugu noqdaan raalli ahaanshaha Allaah. Wuxuu yiri Rasuulkii Allaah: Raalli ahaanshaha Eebbe waa raali ahaanshaha waalidka, carada Eebbana waa carada waalidka. Waxay kuu keentaa in Illaah kuu waasiciyo nolosha (Risqiga).

Wuxuu yiri Nebiga (NNKH): Qofkii jecel in nolosha loo ballaariyo cimrigana loo dheereeyo ha xiriiriyo riximka. Waxay keentaa baari u samaynta waalidku in Eebbe kaa aqbalo ducadaada.

Cumar Ibnu Khadaab wuxuu yiri: Waxaan maqlay Rasuulkii Allaah oo leh: Waxaa idiin imaan doona Uways Bin Caamir oo la socda wafti Yaman ah oo ka yimid Muraaf gaar ahaana Qarni, wuxuu qabi jiray Baras, waana ka biskooday meel hal dirham le'eg mooye, wuxuu leeyahay hooyo uu baari u yahay. Hadduu Eebbe ku dhaarto, Allaah wuu ka aqbalayaa wuxuu rabo. Haddii aad awoodo in uu Allaah kuu baryo samee sidaas.

Labada waalid si guud ayay xaq u wada leeyihiin, haddana hooyadu waxay leedahay xaq dheeraad ah, sababtuna waxay tahay hooyo waa ayadii ku xanbaartay xilli aan qofna qof xambaarin, waxay cunto ku siisay waqti aan cidna cid cunto siin, ayada oo weliba baahan, waxay hooyo u soo jeedaa si aad u seexatid, waxay kaaga dhigtay dhabteeda gogol. Waxaa lagaa soo jaray jirkeeda, waxay kugu qaaday uurkeeda, waliba ku faraxday marka ay habsatay in aad ku nooshahay caloosheeda. Waxay kuu muujisay naaskeeda oo aad ka cabtay caano, biyo iyo macdano isku dhis ah oo aan cidna aadan ka heli karin. Waxay kugu samirtay waxaan qofna qof ugu samrin, hooyo waa midda ku bartay afka aad ku hadasho.

Hooyadu waxay aad kaaga murugtaa marka iyada oo uurka kugu sida iyo iyada oo dhabarka kugu sida ay turunturooto naxdinta ay qaado ayaa la yiri in aadan waligaa samayn karin abaalkeeda wax walba oo aad samayso. Sheeko yar nin Hooyadiis tuurta ku qaaday oo geeyay xajka.

Waxaa la sheegaa in nin yiri waa in aan hooyaday xaqeeda gudaa. Waxa uu go' aansaday in uu hooyada xajka geeyo isaga oo xambaarsan. Wuxuu geeyay xajka isaga oo dusha ku wada, waxa uu ku soo wareejiyay xajka isaga oo xambaarsan, markii ay soo guteen cimradii ayuu dib u sooceshay isaga oo dusha ku sooqaaday.

XILKAS-XUMO

Waxa uu keenay gurigii, markaas ayuu utagay shiikh, kuna yiri shiikhow saw hooyo xaqeedii iga ma dhicin haddii aan dhabarka ku qaaday geeyayna xajka, kuna soo ceshay anoo xambaarsan?

Shiikhii ayaa yiri, Hooyo abaalkeeda ma gudi kartid, maxaa yeelay inta aad samaysay ma dhamma halmar iyada oo ku xambarsan go'a ay kugu xambaarsantahay oo waxyar debcay, naxdinta ay naxday darteed.

Samafalida Waalidka Iyo Xiriirinta Rixinka

Wanaajinta iyo u sama falka waalidka iyo xiriirinta qaraabada waa mid waajib ah. Qofka muslimka ah waxaa laga doonayaa in uu xiriiriyo waalidka, usamafalo daryeelo, kana fakaro noloshooda.

Alle subxaana watacaalaa wuxuu yiri: (Alle u adeeg oo mididin u ahow. Waxbana hala wadaajin. una muuji, naxariis iyo samaan waalidka iyo qaraabada, agoonta, baahanaha iyo deriska qaraabada kula ah iyo deriska aan qaraabada ahayn, saaxiibkaa safarka iyo masaafurka (Tub ku joogga), iyo addoomaha ay gacantiinu hanato).

Suradda al an-Nisaa aayada 36aad.

وَاعْبُدُوا اللَّهَ وَلَا تُشْرِكُوا بِهِ شَيْئًا ۚ وَالْوَالِدَيْنِ
إِحْسَانًا وَبِذِي الْقُرْبَىٰ وَالْيَتَامَىٰ وَالْمَسَاكِينِ
وَالْجَارِ ذِي الْقُرْبَىٰ وَالْجَارِ الْجُنُبِ وَالصَّاحِبِ
بِالْجَنْبِ وَابْنِ السَّبِيلِ وَمَا مَلَكَتْ أَيْمَانُكُمْ ۚ إِنَّ
اللَّهَ لَا يُحِبُّ مَن كَانَ مُخْتَالًا فَخُورًا (36).

Markale Alle wuxuu qur'aanka ku yiri:

“Dhab u tixgeli xilka iyo waajibka Alle korkaada uu yeelay, iyo guud ahaan arrimahuu ku faray, Allahaasoo aad (Xaquuqdiinna) mid kiinba kan kale ku weydiisto, sidoo kalena dhowra xuquuqda qaraabada”.

XILKAS-XUMO

Alnisaa aayada1.

يَا أَيُّهَا النَّاسُ اتَّقُوا رَبَّكُمُ الَّذِي خَلَقَكُمْ مِنْ
نَفْسٍ وَاحِدَةٍ وَخَلَقَ مِنْهَا زَوْجَهَا وَبَثَّ مِنْهُمَا
رِجَالًا كَثِيرًا وَنِسَاءً وَاتَّقُوا اللَّهَ الَّذِي تَسَاءَلُونَ
بِهِ وَالْأَرْحَامَ إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَلَيْكُمْ رَقِيبًا.

Markale Alle wuxuu yiri:

” Aadanaha waxaan kala dardaarannay wanaajinta waalidkiis iyo inuu
naxariis u muujiyo iyo samaan”. Suurada cankabuut.

وَوَصَّيْنَا الْإِنْسَانَ بِوَالِدَيْهِ حُسْنًا.....

Markale Alle wuxuu yiri:

(فَلَا تَقُلْ لَهُمَا أُفٍّ وَلَا تَنْهَرْهُمَا) سورة الإسراء، 23 .

Markale Alle wuxuu yiri:

” Aadanaha waxaan kala dardaarannay waalidkiis, hooyadiis waxay ku qaaday tabar yari tabar yari loo
geeyay. Ka gurintiisuna naaska waa laba sano dhexdood igu shukri aniga iyo labadaada waalidba”.

Suuradda luqmaan.

وَوَصَّيْنَا الْإِنْسَانَ بِوَالِدَيْهِ حَمَلَتْهُ أُمُّهُ وَهْنًا
عَلَى وَهْنٍ وَفَصَّالَهُ فِي عَامَيْنِ أَنِ اشْكُرْ لِي
وَلِوَالِدَيْكَ إِلَيَّ الْمَصِيرُ.

XILKAS-XUMO

Abuu Hurayrah Alle raali haka noqdee wuxuu yiri: (Nebigu (NNKH) wuxuu yiri: “Wiil ma jiro u abaal gudi kara Aabii (Wuxuu wanaag iyo jaceyl galay awgeed) inuu helo maahe Aabihi oo addoon ah oo uu soo iibsado oo markaas xoreeyo”.

Abuu Cabdurrahman Cabdullaah ibnu Mascuud (Alle raali haka noqdee wuxuu yiri: Inuu weydiyey Nebiga (NNKH), Alle agtii camalkeebaa camaladda u wanaagsan oo loo jecel yahay? Wuxuu ku jawaabay ” Salaadda oo waqtigeeda la tukado”. Waxaan weydiyay misna kee? Wuxuu yiri “Labada waalid oo baari loo noqdo”. Dabadeedna waxaan iri misna kee?

Wuxuu yiri: Jidka Alle (Koryeelidda diinta) oo loo halgamo ama loo diriro”. Bukhaari iyo muslim.

Haddaba haddii aan soo sheegnay muhiimada ay leedahay sama falidda waalidka iyo xiriirinta qaraabada. waxaa nala karabaa in aan u ixsan samayno waalidkeen baarina unoqono, una duceyno.

Raac talaabooyinkaan hoose:

U raarici garabkaaga waalidka: Noqo mid unaxariisasho badan labadiisa waalid, una muuji wanaag iyo jiljileec.

Ka foguee buuqa: Waalidka ku hay guri aan lahayn buuq iyo sawaxan, xataa haddii aadan awoodin isku day in aad ka yarayso qeylada, meelaha lagu ciyaaro, kana fogayso caruurta si aysan u dhibin

Ka farxi waalidka: Marka ay taabato da'da haku oran waalidka uf IWM. Alle wuxuu yiri:

(فَلَا تَقُلْ لَهُمَا أُفٍّ وَلَا تَنْهَرْهُمَا) سورة الإسراء، 23

Ku qaabil waji farxadleh: Mar walba oo aad u tagto waalidka ula tag waji furfuran, farxad ka muuqato, wanaagna ku dheehan yahay. Ha ula tagin waalidka waji xirxiran, cabuus ah oo aan naxariis ka muuqan.

5. Ixtiraam umuujii labada waalid, hooyada iyo aabbaha: Waalidka waa inaad fariisistaa meel ku haboon, marka ay kuu yimaadaan soodhawee soodhaweyn aad u saraysa. Mar walba isku day adoo ku faraxsan imaatinkooda fariiso hortooda.

6. Waani labada waalid: Haddii ay yihiin labada waalid, kuwo aan aqoon fiican ulahayn diinta bar, una sharax adoo fahamsiinaya, una nugul, dareenkoodana la socda had iyo jeer.

XILKAS-XUMO

7. Wanaag u samee hooyada: Marka aad u qabanayso waalidka wanaag iyo samafal, ku hor mar labada waalid hooyada. Waayo hooyada xaq bey kugu leedahay kan ka badan Aabbaha.

Abuu Hurayra Alle raali haka noqdee wuxuu yiri: ” Nin ayaa u yimid Rasuulka Alle, wuxuuna yiri: Yaa dadka igu xaq badan? Nebigu NNKH wuxuu yiri: Hooyada. Yaa kale: Wuxuu yiri Hooyada, yaa kale? Wuxuu yiri: Hooyada, misna yaa kale, Wuxuu yiri Nebigu Aabbaha”.

أبي هريرة رضي الله عنه قال: (جاء رجلٌ إلى رسولِ الله - صَلَّى اللهُ

عليه وسلّم – فقال: مَنْ أَحَقُّ النَّاسِ بِحُسْنِ صَحَابَتِي؟ قَالَ: أُمُّكَ،

قال: ثم من؟ قال: ثم أمك، قال: ثم من؟ قال: ثم أمك، قال: ثم

من؟ قال: ثمّ أبوك) رواه مسلم.

8. Ka ilaali waxkasta oo dhib u keeni kara: Ka fogee mushkiladaha saamaynta u gaysan kara waalidka, iyo waxkasta oo ay dhibsanayaan.

9. Adeec marka ay kuu yeeraan: Haddii aad ku jirto mashquul, ama shaqo hayso, ama shir ku jirto waa in aad adeegtaa waalidka una degdegtaa. Waana Kugu khasab in aad yeeritaankooda qaabisho adoo faraxsan.

10. Xiriiri dadka ay xiriirin jireen waalidkaa: Isku day in aad xiriiriso dad ay jeclaayeen oo ay xiriirin jireen, una wanaag samee marwalba.

11. Idan weydiiso: Marka aad u soogalayso waalidka, isku day in aad idan weydiisato, kuna dhahdo Aabbe iyo Hooyo ma soo gali karaa?. Sababta oo ah waxaa dhici karta in ay howl gaar ah ay ku jireen.

12. Xusuusi mar walba xuska Alle: Marka ay waalidku gaboobaan waxay hilmaamaan waxkasta, isku day in aad xusuusiso in ay tukadaan, Wardiyaan, Xuska Alle badshaan.

13. La tasho waalidka: Marka aad baxayso isku day in aad latashato waalidka, weydiisana in aad meel ka soonoqonayso. Isku day in aad mar walba ka ducaysato.

14. Haku degdegin waxay kaaga digaan: Labada waalid marka ay arrin kaaga digaan isku day in aad ka dheeraato waxay kaaga digeen haddaysan sharciga Alle ka hor imaanayn.

XILKAS-XUMO

15. Qaado taladooda: Waalidku waxay had iyo goor jecelyihiin in ay lataliyaan awlaadooda, qaado wixii waano ah oo ay ku siiyaan.

16. U keen hadyado: Mararka qaar waalidka u saar banaanka hadday awoodaan, geena meelaha araga u roon, si ay ugu il qabowsadaan, welwelkana uga haro. Si lama filaan ah ugu gee hadyado waxay jecelyihiin in ay helaan. Ha dhayalsan arrintaas waxaa ku jirta cilmi weyn.

33 Nasteexo oo ku saabsan la qaabka loola dhaqamayo Waalidka

Sadex iyo sodon talaabo oo kuu sahlaya sidaad ugu samafali lahayd waalidkaaga.

1- Dhagayso hadalkooda, marka ay hadlayaan.

Waxaa kugu waajib ah in aad dhageysataa waalidkaaga marka uu kula hadlayo aad yeesha waxa uu ku amrayo kana fogaataa wax kasta oo ka carreysiin karaa unu dhaga nuglaataa.

2- Rayigooda ka aqbal mar walba.

Marka ay waaladiintaadu kula imaadaan rayi haka diidin, kuna raac sida ay ayaga jecel yihiin, waaladiintu majecclaa weelka markasta ka dhago addega waxa ay u sheegaan, haddi waalidkaa aad markasta wuxuu damacsan yahay u sameysaa halkiisa waxaad ka heleysaa ducso kuu furaysa albaabo badan addun iyo aakhiraba.

3- Marka aad eegayso hoos madaxa u dhig.

Marka uu waalifkaaga kula hadlayo ama aad la hadleyshid ha u fiirin sidii qof asd isku factihiin oo kale, waa in aad madaxaaga hoos geysaa aadna u muujisaa qadarin.

4- Inaad u amaanto si joogto ah.

Waalidkaaga markasta oo aad amaanto waxa dareemayaa kalsooni dheeraad ah, kalsoonida uu kugu qaba waa ay sii siyaadeysaa.

5- In lala wadaago farxadooda.

Markasta oo aad guul gaarid ama arrin farxadeed kugu soo korodho waa in aad la wadaagtaa waalidkaaga, waayo farxada aad adiga dareemeysid mid ka weyn ayuu dareemayaa.

6- Ha ka sheegin war aan haboonayn.

XILKAS-XUMO

Waalidka markasta oo aad ka sheegtid hadal aan haboonayn waxa ugu eegayaa il gaar ah maadaama aad dhaawacday qabligiisa, halkiisa waxa aad ku muteysan kartaa habaar.

7- Inaad amaanto saaxiibadooda ay jecel yihiin.

Waalidku markasta oo uu arko weelkii uu dhalay oo amaanaya ama qadarinaya saaxibkiisa aad ayuu ugu farxayaa arrintaas.

8- In la xasuusiyo horumarkii ay hore u sameeyeen.

In aad xasuusisaa waalidkaaga horumarkii ay waa hore soo sameeyeen haday ahaan lahayd dadaalkii ay adiga kugu soo bixiyeen sida: koriimadaada oo ahayd mid aad u wanaagsaneyd ama juhdigii ay kugu soo giliyeen warbarashadaada taasi waalidkaagu waxa uu ka qaadayaa reynreyn ama in ay ka muuqato farxad, maadaama tacabkii uu beertay uu guranayo mirihiisa.

9- Ia qaybso xanuunkooda mar walba.

Markasta oo aad la qeybsatid walidkaaga marxaladaha soo wajaha, haddii uu xanuunsado ama ay wax ku dhacaan waxaa kugu waajib ah in aad la qeybsatid xanuunkooda sidii waa horeba markii aad adiga dhalaanka ahayd ay kula qeybsadeen dhib iyo dheefkaagaba, arrintani waalidku waxa ay ka dajineysaa culayskii saa'idka ahaa.

10- In aanad xasuusin meelihii ay ku gabood faleen noloshooda.

Dadka waaweyn ama waalidiinta ma jecla in aay xasuustaana gabood falyadii ay horey sameeyeen aad ayeyna ugu shalaayaan, adiga ka weel ahaan waa in aad ka fogataa wax kasta oo xusuus dambiyeed galin kara walidiintaa.

11- Meesha ay fadhiyaan ha ku mashquulin wax ka baxsan hawsha taala meeshaas.

Waalidku markasta ma jecla in loo sheego ama lagu mashquulo waxyalaha ay markaasi hayaan marka isku day sidii ay ayaga doonayn in aad u sameysaa.

XILKAS-XUMO

12- In loola fadhiyo si ixtiraam ku dheehan tahay.

Marka aad la fadhisid waalidkaaga ula fadhiiso si ixtiraam, qadarin iyo daganaan ku dheehan tahay, si ay u dareemaan kalsooni dheeraad ah.

13- In la tuso in ay tahay afkaartoodu mid sax ah had iyo jeer.

Markasta oo uu walidku u arko arinta mid sax haka afkaar duganaanin kuna raac afkaartooda waayo majecda walidku in uu ku dhaho weelkiisa afkaarta uu aaminsan yahay in ay tahay qalad halkiisa waalidku wuu ka carroonayaa waxaase laga yaaba habaar waalid kaaga soo gaaro, markasta waalidkaaga ku raac afkaartiisa sax iyo qaladba.

14- In aan lagu dhex goyn sheekada ay wadaan.

Marka aad la sheekeysaneysid ama aad u sheekeyneysid waalidkaa, sheekada dhexda ha ugu goyn u dhameystir, wax kasta ka run sheeg.

15- In la baro ubadka yaryar sida ay ula dhaqmayaan.

Waa waajib in dhalaanka yari la baro sida ay ula dhaqmi lahaayeen waalidkoodu ugu dugnaato sida dadka kale ayna ku eegraan il gaar ahaneed.

16- In aan lagu garaacin ubadka yar yar hortooda.

Waalidiinta markasta ma jecla in hortooda lagu gaaro ubadja yar yari sabaabtuna waa in waalidiintu ay naxariis badan yihiin, dhinaca kale waxa ay ka arkayaan in hortooda lagu garaaco ubadka yar yar ay tahay in ayaga la qadarineyn.

17- In laga qaato nasteexo kasta oo ay soo jeediyaan.

Waxaa kula gudboon in aad walidkaaga aad ka qaadatid nasteexo kasta oo ay kuu soo jeediyayaan, walidintaadu ayaga ayaa kaa yaqaana arimaha dantaada ah lagamana yaabo in ay ku dhagraan sidoo kale waa dad waayo arag ah.

XILKAS-XUMO

18- Meesha ay fadhiyaan cida maamulaysaa in ay iyaga ahaato.

Haddi ay waalidkaagu ay gaboobaan ama ay wali dhaqaaqi karaan waxa ay jecel yihiin in ay ayaga maamulaan meesha ay markaasi ku nool yihiin, hana isku dayin in aad sameysaa ama aad qaada tallaabo aysan ogeyn ama aysan raaliba ka ahayn.

19- In aan codka kor loogu qaadin.

Hadii aad waalidkaaga aad la hadlaysid kor ha ugu qaadin codkaaga markasta codkooda ha kaa sareeyo kaagana haka hooseeyo markasta si ay u dareemaan kalsooni.

20- Marka la socdo in aan laga hor marin talaabada.

Marka aad la socotid waalidkaaga markasta ayaga hakaa horeeyaan adigan dagaashood socco Talaabadaadana haka dambeyso tooda.

21- Marka la cunayo inaan laga hor marin gacanta.

Waxkasta oo aad isla sameyneysaan adiga iyo waaludkaaga markasta ha horeyso mida waakidkaaga adiga ka dambeey markii uu asiga tijaabiyo ka dib adiga tijaabi.

22- Indhaha in aan lagu gubin, oon si xun loo fiirin.

Matka adiga iyo waalidkaa aad isla hadleysaa ama arrin adin ka dhaxeyso aad ka hadleysaan waalidkaa indha ha ku gubin si xun ha u fiirin sidaa cagsigeeda hoos fiiri wax kasta oo uu ku dhaha ka yeel oo ku oran maya.

23- In lagu faano , in ay yihiin kuwa ku dhalay.

Markasta oo aad ku faantid waalidiintaadu in ay yihiin kuwii kula dhalay oo allihii sareeyey uu sabab uga dhigay in aad dunida timaadid markasta iyo meelkastana ka sheegtid ayaga sidaa si ka daran ayey kugu faani doonaan.

24- Marka meel lawada fadhiyo inaan lugta lagu fidin.

XILKAS-XUMO

In kastoo ay waalidiinta ay yihiin kuwo naxariis badan ayna la jecel yihiin wax kasta ubadkooda sidaas la ajligeeda hadii aad meel wada dadhidaan lugta ha ku fidin oo sii meel firaaqo ah oo ay ku nasan karaan.

25- In aan loo soo jiidin wax dhibaateeya.

Waalidku ma jecla wax dhibaato galinaya nafsadiisa ama adiga nafsadaa, sidaasi awgeed ka fogow wax kasta oo u soo jiidaya dhibaato.

26- In loo duceeyo mar walba.

Waalidinku markasta waxa uu kaaga baahan yahay duco hadii uu nool yabay ama haddii uu geeriyooday sidaasi darteed waalidkaagu u ducee marksta iyo meelkastaba.

27- Inaan la tusin in la dhibsanayo marka lawada joogo.

Marna yuusan kaa dareemin waalidkaagu wax dhibsasho aj marka lawada joogo ama haddii uu kuu diraayo hawl aadan jecleyn ku qadari asiga yuusan kaa dareemin wax dhibsasho ah.

28- In aan lagu qoslin hadii ay ka soo baxaan fal aan haboonayn.

Haddii uu waalidku qabsado fal saba qosol haku qoslin waalidiinraa sida dadka caadiga ah sidaasi badelkeeda haddii ay arrinta qabsatay ay tahay mid murugo la qeybso murugada.

29- In loo adeego iyagoon kaa dalban.

Haddi waalidkaaga aad u qabatid wax aysan ayaga kuu dirsan ama kaa dalban si joogto ahna aad ugu sameysid arrinkaa waalidku waa naxariis badane sidaasi si ka daran ayuu adigana kugu duceyn doonaa adiga oo aan ka dalban.

30- In la badiyo booqashadooda mar walba.

Haddii aad kala meel dagan tihiin ama aad kala fog tihiin waa in aad badisaa booqashada war walba in walba oo ay taasi ka wanaagsan tahay in dharaar walba aad iska soo horbaxdaan.

XILKAS-XUMO

31- In lagula hadlo kalmadaha ixtiraamka huwan.

Kalimad walba oo aad waalidkaaga kula hadleysid waa in ay noqotaa mid ixtiraami ay ku dheehan tahay taasi waxa ay waalidku dareesiineysaa ixtiraam iyo kalsoini dheeraad ah.

32- In loogu yeedho qaabka ay ugu jecel yihiin.

Waalidku markasta waxa ay jecel yihiin in loogu yeero sida ay jecel yihiin ayaga sudaasi cagsigeedana ay neceb yihiin in loogu yeero wax aysan ayaga jecleyn adiga ka weel ahaana aad ugu yeedho waalidkaagu sida ay ayagu jecel yihiin oo ayna farxad ku dareemi karataan.

33- In loo dhago nuglaado.

Waalidku markasta waxa ay jecel yihiin awlaada baariga ahna una dhago nugul wax kasta oo ay usheegaan ama ay faraan sideena ama si dagdag ah u qabta, weelkaas markasta iyo meelkasta waa ay jeclanayaan wayna kaga dhaweysanayaan awlaadooda kale in kasta waalidku ay caruurtiisu isugu mid ay u yihiin.

Ogow waalidkaagu waa dheeman dhulka dushiisa yaala ka faa'idayso inta aanan ciida lagu aasin.

Xaqa labaad ee xaqa Ilaahay ku xigaa waa xaqa waalidka , marnaba ha ku gabood falin, baro oo ku dhaqan.

XILKAS-XUMO

Sheeko Cuqubo Waalid

Waqtigu caweysin buu ahaa, shanqartuna way go'day waxaanan ahayn caleemaha jababaxdooda markii ay laydhu marto.

Warsame markaa waxa uu ka soo laabtay socdaal gaaban oo uu meel aan sidaa u fogeyn ku gaadhay.

Nin aad u da' weyn buu ahaa adkaysina u lahayn jirro (xanuun) walba noocuu doona ha ahaado ee.

Inta markiiba la dedey ayaa dab loo shiday, daawo iyo qur'aanna lagula daalay.

Beryo haddii la baantay oo uu boksoodayna indhihii ayaa araggii laga qaaday.

Sidaa darteed, buu odaygii u laasimay guriga.

Marka uu meel u baahdo, taasina ay yareydba, waxaa hagi jirey inan uu dhalay.

Inanku aad buu u necbaan jiray hawshaa, in badanna waxa uu isku dayey in uu ka leexleexo.

Marmar kale, waxa uu ku dadaalay in uu odayga luggooyo, dhibaateeyo, xumaato badanna wuu kula kacay, si looga daayo hagidda.

Hase ahaatee, way u suurtoobi weyday oo cid lagu beddelaaba may jirin.

Sidaa darteed, baa isaga oo maalin hagaya odayga, meel cidla ahna ay socdaan, ayuu damcay in uu fuliyo wax beri yahaan ba maskaxdiisa ku wareegaayey.

"Eeyaa aabbe," ayuu ugu yeedhay.

"Hee", buu odaygiina u ceshay.

"Geedkan hoostiisa iska sii fadhi aan dudumadaa koro (fuulo) oo bal aan eego halka aan ku aaddanahay e," ayuu inankii yidhi.

"Aabbe ha iga raagin," odaygii baa ka sii daba-geeyey.

Sidii buu ku fakaday inankii.

Inta uu Aabbihii cidla kaga dhaqaaqay baa bahallana odaygii bartii ku cuneen markii habeenkii dumayba.

Inankii markii uu weynaaday buu guursaday.

Wax ubad ah wiil keli ah buu ka dhalay.

Haddii uu wiilkii wax xoogaa le'ekaaday ninkii baa indhihii beelay.

Markaas baa tabtuu Aabbihii ku ahaa wiilkiina ku noqday.

Beri dambe ayaa wiilkii Aabbihii ku yidhi, iyaga oo maraya meel cidla ah, "Aabbe geedkan hoostiisa iska sii fadhi anigu dudumo aan koro oo bal eego meesha reerkii innaga xigo ee."

Ninkii inta uu soo xusuustay eraygii isaga iyo Aabbihii dhexmaray waagii, ayuu wiilkii weydiiyey, " meeshan magaceed?"

Jawaabtii inanka ayuu ogaaday, odaygii in ay meeshu tahay bartii uu waagii Aabbihii kaga tegey.

Haddii uu sidaas wax u fiirfiiriyey buu ku dhawaaqay, "waar kolley ii soo noqon mayside orodoo iska tag ".

XILKAS-XUMO

Sidaasi darteed, Soomaalida waxa ay ku maahmaahdaa oo ay tiraahdaa:

- ✓ Nimaad dhashay Kuma dhalin
- ✓ Habaar waalid waa halis
- ✓ Nin weyni wadkiisa waa yaqanaa
- ✓ Booraan-Hadimo ha qodin, ku dhici doontaana mooyaane, e

Dulucda sheekada

Sheekadaan waxaan ka fahmi karnaa in waxa aad maanta tacbato aad bari heli doonto haddii aad digir beerato digir lee kuu soo baxayso oo ma sugi doontid masago ama Gallay.

Hadaba inta ay waalidiintaadu kuu nool yihiin in aad ka faa'ideysto oo aad ka duceysato ku dadaal walaal.

Labadaada waalid dhexdooda ayay ku jirtaa mustaqbalkaada iyo halka ciribta dambe kuu dambeeni doonta immaa Janno iyo immaa naar Alle ka sokow.

XILKAS-XUMO

CUTUBKA4:AAD

BARBAARINTA

BARBAARINTA

Barbaarinta wanaagsan

Dunida habka barbaarinta ubadka waa lagu kala duwan yahay. Kala duwaanshahaas wuxuu noqon karaa tusaale wixii aad dhaqan wanaaga u aragto iyo sida loo xakeemeeyo/xadidis ilmaha.

Finland waxaa lagula taliyaa iney ilmaha u barbaariyaan shi dhiirigelin leh. Waalidkuna qeyb weyn bey ka yihiin nolol maalmoodka ilmaha, dhiirigelin iyo kaalmo. Ilmaha xitaa waxaa lagu dhiirigeliyaa inuu si iskiisa u fiikiro, baarbaarinta lagu dhiirigeliyo waxay ka caawisaa ladnaanshaha, inuu isku farxo iyo dad la dhaqan. Ilmihiina wuxuu baranayaa muujinta iyo xal u helista dareenkiisa.

Cinqaabta edbinta ilmahu waa mamnooc

Waalidku xaq ayey u leeyihiin masuuliyadda xakameynta ilmahooda. Waalid walba waxaa lasoo gudboonaan kara xaalad ah inuu wax ka qabto siduu ilmihii u dhaqmayo. Sharciga Finland waa ay ka reeban tahay wax walba oo jir ahaan loo geesto ilmaha. Ilmaha yet laguma dhufan karo ama in tinta lagu dhego. Siduu kale waxyeelo nafsiiyan ah xitaa looma geysan karo sida inaad caaydo ilmihii, yasto, u hanjabto, cabsi geliso, qalbijab iyo qeylaba aad u geysato waa mamnooc.

Ilmuhu edbinta cinqaabta uma wanaagsana. Waxay gelistaa cabsi iyo welwel. Cilmibaarista la sameeyey ilmaha lagu edbiyey si cinqaab leh waxay noqotaa mid isagana laga sii dhaxlo oo jiilka danbe ayuu usii gudbiyaa, taasoo macnaheedu yahay yet qaadista dadka waaweyn, kaasoo carruurnimadiisii wax lagu soo dhufan jirey.

Caawinaad iyo kaalmo barbaarinta caruurta ayaa jirta. Haddii aad caawimo u baahan tahay waxaa habboon inaad wakhti weydiisato talo tusaale rugta dhalaanka iyo hooyooyinka, rugta qoysaska, xanaanooyinka ama iskuulka. Sidoo kale talosiinta iyo adeega sooshalka qoysaska carruurleyda ah ayaa ku caawin kara.

Xaaladaha furriinka

Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay haddii ay waaliskiisu is furaan inuu la leeyahay labada waalidba xariir wanaagsan. Waalidku markey is furaan waa iney ka heshiiyaan masuuliyada ilmaha, halkuu ku noolaanayo, la kulanka waalidka kale iyo masruufka.

Waalisku waa iney xal ka gaaraan in ay masuuliyad wadareedka ilmaha wada lahaanayaan iyo labada waalid midkuu la noolaanayo. Ilmuhuna wuxuu xaq u leeyahay inuu la kulmo labadiisa waalid. Waalidkuna waa lagu waajib karaa inuu bixiyo masruufka. Masruuf ilmaha midka uu la noolyahay mooyee kan kale.

Masuuliyad wadareed mise keli daryeele

Furiinka ka dib, inta badan ilmaha si wadajir ah ayey labada waalid masuul uga noqdaa. Taas macneheedu waa labada waalid si wadajir ah ayey go'aan uga wada gaaraan arrimaha muhiimka ee ilmaha khuseeya, sida barbaarinta, daryeelka caafimaadka ama safar aadidda. Waxyaabaha maalin walba jira ee nolosha caadiga ah waxaa go'aan ka gaara waalidka uu ilmuhu la nool yahay. Ilmaha ay labada waalidba masuulka ka wada yihiin looma kaxayn karo waddanka dibediisa, haddii aanu waalidka kale raalli ka ahayn. Haddii ilmaha loo dalbayo baasaboorka, waalidka kalena waa inuu saxiixaa foomka baasaboorka lagu dalbayo. Haddii furiinka ka dib ay suuroobi weydo in ilmaha si wadajir ah masuul looga wada noqdo, labada waalid midkood baa dalban kara inuu isagu keligii masuul ka noqdo ilmaha. Taas macneheedu waa waalidka keligii masuulka ka ah ilmaha ayaa si keli ahaan ah go'aan uga gaari arrimaha ilmaha khuseeya, umana baahna inuu waalidka kale la tashado. Hase yeeshee mar walba waa in la tixgeliyaa inuu ilmuhu xaq u leeyahay, inuu labadiisa waalidba la kulmo.

XILKAS-XUMO

Haddaan heshiis dhalan

Haddii arinku fara kabax noqdey, waalidkuna ku heshiin waayeen arrimaha, lama gaari karo heshiis dandhowraha carruurta Sameynta heshiiska awgiisna waxaa ka caawinaya adeeg gaar ah, waanwaanta arrimaha qoyska beejkooda Ka aqriso dheeri waanwaanta arrimaha qoyska adeega arrimaha bulshada qoysaska.

Haddii uusan weli heshiis dhicin, waxaa suurogal ah in loo baahdo kaalmo garyaqaan, ama in maxkamad leyla fuulo. Halkaa markey gaartana maxkamadda ayaa xukmineysa, waalidka uu ilmihii la noolaanayo iyo siduu waalidka kale ula kulmi lahaa. Maxkamadduna waxay u baahan tahay shaqada sooshalka xaqiijinta xaalada.

Ku talojirka furriin ama xaalad furriin waxaad heli kartaa caawimo marxaladaha kala duwan eed ku jirto, sida howlaha qibrad waddaaga. Sidoo kalena ilmuhu xitaa waxay helayaan horin u gaara. Weydii noocyada adeeg ee degmadaada sida adeega ama talosiinta sooshalka qoysaska carruurleyda.

Xaquuqda carruurta

Dhamaan carruurta iyo qoysaska carruurleyda waxay qeyb ka yihiin dastuurka wadanka. Dastuurka Finland waa mid mudnaan lagu siiyey bulshada, heshiisyada caalamiga. Carruurtuna mida u muhiimsan waa sida uu qabo heshiiska QM.

Mudnaanta hore waxaa iska leh xaquuqda carruurta, markii reerka loo sameynayo adeega dadweynaha, kaalmada iyo caawinaada xaquuqda carruurta waxaa saameyn ku yeelanaya fikirka waalidka, reerka iyo barbaarinta.

Heshiiska xaquuqda carruurta wuxuu ku bilowdaa in, masuuliyadda carruurta barbaarintooda iyo kobcintooda leeyihiin waalidka iyo cida ka masuulka. Deegaanka inta badan wuxuu isku deyaa siduu uga kaalmeyn lahaa waalidka howshaas. Qoyska ilmoyleyda waa in wakhti hore oo munaasib ah la caawiyo.

XILKAS-XUMO

Heshiiska guud ee xaquuqaha ay carruurtu leeyihiin

Ilmo waliba wuxuu xaq u leeyahay, inuu helo carruurnimo wanaagsan oo nabadgelyo leh. Carruurta oo dhan waxay xaq u leeyihiin inay koraan oo iskuul dhigtaan iyo weliba inay dheeldheelaan oo ka qaybqaataan. Ilmo waliba wuxuu kaloo xaq u leeyahay magangelyo iyo daryeel. Dhammaan xuquuqaha ay carruurtu leeyihiin oo dhan waxaa la isugu soo ururiyey heshiiska guud ee xuquuqaha ay carruurtu leeyihiin ee Qaramada Midoobey. Heshiisku waa wax si guud ahaan ah loo aqbalay oo a xuquuqaha ay tahay inuu ilmo walba lahaado, xuquuqahaasina kuma xidhna asalka ilmaha, ha ahaato dhalashadiisa, diintiisa ama hantida qoyskiisa. Heshiisku wuxuu khuseeyaa qof walba oo 18 sano ka yar.

Waddamada adduunka intooda badan way aqbaleen heshiiskan. Heshiiska guud ee xuquuqaha ay carruurtu leeyihiin wuxuu waddanka Finland ka hirgalay sannadkii 1991. Heshiisku wuxuu dadka u qabtaa sida sharcigu dadka u qabto oo kale, sidaas darteed waddamada, degmooyinka, shaqaalaha maamulka, carruurta waalidiintooda iyo dadka kale ee qaangaarka ah waxaa waajib ku ah inay heshiiska u dhowraan si la mid ah sida sharciyada loo dhowro. Heshiiska guud ee xuquuqaha ay carruurtu leeyihiin iyo sharciyada Finland baa si wadajir ah u sugaya xuquuqda carruurta. Sharciyada Finland waxaa ku jira qodobbo badan oo dhigaya, in carruurta loola dhaqmo si sinnaan leh oo ah inay shakhsiyaad yihiin, carruurta oo dhanna waa in si isku mid ah xil la isaga saaraa.

Sharciga ayaa xoojinaya heshiiska xaquuqda carruurta

Heshiiska xaquuqda carruurta waa muqadas, sida qodob dastuuri ah. Dowladaha, degmooyinka, waalidka carruurta iyo dadyowga masuuliyiintuba waa iney u hoggaan sanadaan heshiiska.

Waxaa heshiiskaas u dheer oo lagu ilaalinayaa xaquuqda carruurta sharciga Finland. Finland waxay leedahay qodobbo badan, taasoo waajib tahay in sigaara oo sinnaan ku jirto lagula dhaqmaa carruurta.

Danta ilmaha ayaa ugu muhiimsan

Dhammaan go'aanada laga gaarayo ilmaha wa in mudnaanta la siiyaa danta ilmaha. Waxaa dhici karta inay adkaato in la qeexo siday ilmaha dantiisu ku jirto, sababtoo ah waxaa dhici karta in dadka kala duduwan fikrado kala duduwan ka haystaan waxa ilmaha u fiican. Danta ilmuhu siday ku jirto macneheedu ma aha, in mar walba go'aan ama xal lagu gaarayo siduu ilmuhu rabi lahaa ama siday waalidkiis rabi lahaayeen. Marka la eegayo siday ilmaha dantiisu ku jirto, ilmaha fikradiisu waa muhiim, laakiin khasab ma aha in ilmaha fikradiisa iyo ilmaha dantiisu siday ku jirtaa isku mid yihiin..

Ilmuhu waa ka qaybqaadan karaa

Danta ilmaha waxaa muhiim ah inuu ilmuhu ka qaybqaadan karo, marka arrimaha isaga khuseeya la falanqaynayo iyo marka la qorshaynayo. Waxa go'aanka laga gaarayo iyo sababtu waxa ay tahay waa in si ku filan loogu sharaxaa ilmaha, si uu arrinta fikrad uga yeesho oo fikradiisa u sheego. Qof walba, xitaa ilmo ha ahaadee wuxuu mar walba xaq u leeyahay inuu ka qaybqaato falanqaynta arrimihiisa lagu samaynayo. Taasina xad da'da ah ma laha. Iyadoo la tixgelinayo ilmaha da'diisa iyo heerka horumarka koriinkiisa ayaa la dhegeystaa ilmaha fikradiisa iyo waxyaabaha uu rabi lahaa. Tusaale ahaan ilmaha yar oo kale waxaa dareemadisa loo kuurgeli karaa oo la ogaan karaa iyadoo loo fiirsanayo siduu u dhaqmayo iyo ciyaaraha uu ciyaarayo. Ilmaha weyn shaqaaluhu waa inay arrimaha jira ugu sheegaan si uu u fahmi karo.

Ilmaha ay 12 sano u buuxsantay awood hadal oo arimo badan buu u leeyahay isagu. Awoodda hadalka macneheedu waa in marka laga hadlayo arrimaha khuseeya badbaadada carruurta fikradda ilmaha waa in loo tixgeliyaa si la mid ah sida loo tixgeliyo fikradaha dadka qaangaarka ah. Tan ah inuu ilmuhu ka qaybqaadan karo arrimaha isaga khuseeya falanqayntooda, macneheedu ma aha inuu ilmuhu go'aanka gaarayo. Dadka qaangaarka ah bay waajib ku tahay inay go'aamada gaaraan, qaadaanna go'aamada ay gaareen masuuliyadooda.

XILKAS-XUMO

Ku Tarbiyenta Carruurta Salaada

Waxaan tusaale u soo qaadaneynaa, in ay isdoortaan waalidyo ku haboon iney soo saari karaan jiil wacan oo islaamiya , Taas oo macaneheedu yahay, In uu aabuhu doorto Oori wacan oo diin leh, isaga oo tixraacaya Axaadiista nebiga ee tilmaameysa arintaas oo ah in la doorto gabadh diin leh, sidoo kale waa in Gabadha loo dooraa nin wacan oo diin iyo akhlaaq leh, taas waxaa dheer in qoyska lagu asaaso hab Islaamiya, inkastoo sida la isku mehersado Diinta Islaamka hadana waxaa xigta in guriga loo asaaso sida Gaalada iyadoo dadka badankoodu sameeya habeenka arooska wax aad u khilaafsan Islaamnida tan oo aan kawada dheragsanahay oon inooga baahneyn faalo.

Hadaba hadaan dib ugu soo laabto Tarbiyada Ilmaha waxaa la inooga baahan yahay arimahan soo socda:-

1-In la baro ilmaha wax kastoo faa'iido u soo hoynaya Ifka iyo Aakhiraba sida in la Baro Shahaadateynka

2-In lagu talaalo qalbiga Ilmaha Jacaylka Alle iyo Rasuulkiisa Muxammed (SCW) iyo aasxaabtii.

3-Inla xafadsiiyo suuradaha quraanka iyo aayado hadba intii uu kari karo.

4-In Salaada la faro marka uu gaadho 7 sano.

5-In lagu rabeeyo dahaarada sida weysada, laguna ababiyo runta amaanada iyo xidhiidhinta Qaraabada.

6-In laga dheereeyo wax kastoo wisikheyn kara qalbigiisa wanaagsan sida TV yada faafiya akhlaaq xumada sida Musalsalada, Filamada iyo Heesaha oo weliba kus oo biireen qaar afkooda ku hadlaya.

XILKAS-XUMO

TVGA waxaan odhan karnaa waa barbaariyaha iyo macalinka aqalo badan iyo ubad badan oo Muslimiin ah.

7-Barida Akhlaaqda wacan Waalidna masiin ilmihiisa wax ka wacan akhlaaqda wacan.

8- Ka fogeynta balwadaha sida sigaarka Qaadka iyo wixii la mida se ka waran waalid hadii aad adigu ku imtixaamantahay balwad waxuunbaad u gudbineysaa Ilmahaaga waxaas aad ku imtixaamantahay.

9- Ku ababinta ilmaha Geesinimada, iyo daacadnimda.

10-Barida iyo uga sheekayta Saalixiinta iyo culimada iyo dadka Taariikhda wacan ku leh dunida, se maxaad uga sheekeyn hadii aad adiguba waxba dhaamin.

Gafafka laga galo Ubadka:-

1-Faham la'aanta niyada ilmaha, iyo moogaanta daeenkiisa in badan oo waalidiinta ka mid waxay ula dhaqmaan si ad adeyga iyagoo dagaalaya kuna ciqaabaya garaacid iyo yasid, inkastoo ilmaha laga horjoogsanayo hadii uu khalad galo laguna ganaaxi dagaal iyo hanjanaanba, hadana waxaa waalidiinta badankoodu ilmaha u arkaan waxaan dareen badan lahayn.

2-Ilmaha waa inuu waalidku u noqdaa tusaale wacan, waa in waalidiintu ku murmin ilmaha hortiisa iskana jiraan wax kastoo ilamaha dareenkiisa dhibi kara, waayo ilmuhu waa jile wacan oo si dhib yar u qaadan kara wax kastoo uu ka arko waalidkiisa, taasna waa mid aan ka aragno nolol maalmeedka, waa inaan tusaale waca ugu noqonaa akhlaaqda wacan iyo samaha, oo aynaan maqashiin ereyo dhegihiisa wiskheeya.

3-Waa naxariis badan loo mujiyaa ilmaha sida uu rasuulku ku yidhi ninkii yidhi welegay ma dhunkan ilmo aan dhaley, oo Rasuulku ugu jawaabey qofkaan naxariisan looma naxariisto.

XILKAS-XUMO

4-Waa ilmayaasha laga simaa cadaalada oo aan look ala eexan.

5-waa inilmaha wax la baraa taas oo loo aayayo ifka iyo aakhiraba.

Arimo loo bahanyahay il daneeyo:-

1- Ilmaha in labaro edaabta wacan sida midigtuu wax ku cuno, sida uu gelao musqusha uga soo baxayo.

2- Ku barbaarinta ilmaha Nadaafada.

3- Hablaha oo lagu tarbiyadeeyo xijaabka iyo dhowrsanaanta.

Kelmado kooban ama maqaal gaaban laguma soo koobi kaaro mawduuacan ee tani waa baraarujin keliya, se hadii lahelahaa qoyasas badan oo sidan u tarbiyadeeynaya ubadkooda waxa soo bixi lahaa jiil anfac badan leh iyo bulsho wacan.

Talooyin Wax Ku Ool Ah Oo Ku Saabsan Barbaarinta Caruurta

Caruur barbaarintu waa xirfad ay waaliddiintu is dheer yahiin. Sida xirfadaha kale oo dhan, qofkii barta barbaarinta hagaagsan ee caruurta, waxaa inta badan laga gartaa caruurta uu tarbiyeeyay. Waayo xigmad caan ah ayaa oranaysa: “Qof waxuu bixiyaa, waxuu hayo!”. Sidee ayuu waalid ilmahiisa si wanaagsan ugu barbaarin karaa, hadii aanu ogayn ama aqoon waajibka saran?

Caruur badan ayaa maanta ku sugan xaalad aad looga naxo, akhlaaq ahaan, diin ahaan, waxbarasho iyo bulsho ahaanba. Taasna micnaheedu ma ahan in ay ilmahu xumaan ku dhasheen, ee waxay u badan tahay, in ay soo barbaariyeen waalidiin dayacay ilmaha ama kuwo aan aqoon u lahayn barbaarinta haboon ee caruurta. Bulsho xunna ma jirto ee waxaa jiro bulsho ka kooban qoysas aan aqoon u lahayn sida caruurta loo barbaariyo. Dabcan dhalintaa aan la tarbiyadayn waxay mushtamaca ku tahay dhaawac wayn oo khatar ku ah diinta iyo dhismaha bulshadaba.

Halkaan waxaad ka helaysaa oo uu daryeelmagazine.com kugula wadaagayaa talooyin kaa caawinaya sidii aad u barbaarin lahayd caruur ku korta mabaadi’da Islaamka.

1- Guurso qof diin leh: Talada ugu horaysa ee barbaarinta caruurta waa inaad marka horeba guursato qof diin leh. Diintu waa waxa ugu muhiimsan ee qof lagu doorto. Abu Hurairah, radiallahu ‘anhu, waxuu wariyay in Rasuulku, sallallaahu ‘alaihi wa sallam, yiri: “Dumar waxaa loo guursadaa afar shay: xoolaheeda, magaca qoyskeeda, quruxdeeda iyo diinteeda. Marka doorta dumarka diinta leh, hadii aydnaan rabin inaad khasaartaan.” [Bukhari iyo Muslim.] Doorashada xaasku dhaqmaya mabaadii’da Islaamku waxuu maalinta ugu horaysaba kula aas-aasayaa guri ku dhisan diinta Islaamka, ilmahuna dhaqan xumo kama baranayaan.

2- U akhrinta buugta iyo u sheekayntu waa muhiim: U bilow inaad ilmaha buugta ciyaalka u akhrido; iyaga oo yarna u sheekayso, si ay luuqadda iyo dhagaysiga u bartaan. Inaad horay ugu bilowdo ayaa aad u haboon. Buug u akhrinta caruurta waxa ay ilmaha iyaga oo aad u yar tusaysaa in waxbarashadu xiiso leedahay, waxayna baranayaan sida wax loo dhagaysto, oo loo qaato waxbarashada. Muhiimnimada wax akhriska waarid walba wuu ogyahay. In caruurta buugta loo akhriyo waa jidka ugu wanaagsan oo ay guul ku gaaraan – aqoon ahaan iyo qof ahaanba.

XILKAS-XUMO

3- Ciyaartu hal-abuurka iyo fadhiga ayay ilmaha bartaa: Marka ilmahu ciyaar gaaro, ku dhiiri gali inay ku ciyaaraan qalabka kor u qaadaya fakarkooda iyo waxqabadkooda; waxa kaliya oo aad ka taxadartaa in qalabka ciyaartu uu diinta waafaqsan yahay, dhibna aanu u keenayn. Ciyaarsiinta ilmaha waa hadiyad ka mid ah hadiyadaha uu waalidku ilmahiisa siinkaro. Ciyaartu waxay ilmaha ka caawisaa inay yeeshaan hal-abuur, ilmaha way ku dagaan, waxayna galisaa himad ay ku arkaan waxa ay awoodaan.

4- Waxaad ku bilowdaa inay bartaan muhiimadda caabudidada Ilaahay: Waxa ugu wanaagsan ee waaridka Muslimka ah uu ilmahiisa bari karo waa inuu ku adkeeyo ilmaha, laga bilaabo maalinta ay waxkala garan karaan, in Ilaahay (swt) uu yahay kan kaliya oo xaq lagu caabudo. Tani waa fariinta ugu muhiimsan ee uu Nabigeenu (Nabadgalyo iyo naxariis korkiisa ha ahaatee) na faray, waana furaha janada.

5- Ilmaha u naxariiso: Naxariistu waxay dhashaa naxariis. Hadii aan ilmaheena u naxariisano, iyaguna dadka kale ayay u naxariisanayaan. Nabigeenu (Nabadgalyo iyo naxariis korkiisa ha ahaatee) waxuu ahaa tusaalaha ugu wanaagsan ee u naxariisashada ilmaha.

6- Bar tusaaleyaashii geesiyadii Islaamka: Halkii aad Batman iyo Superman uga sheekayn lahayd, uga sheeke geesiyada dhabta ah sida nabiyadii iyo asxaabtii. Sida: Abu Bakr, Umar Ibn Khattab, Osman bin Affan, Ali Bin Abi Talib, dhamaantood Ilaah ha ka raali noqdee, iyo kuwo kale. Usheeg sida hogaamiyeyaasha Muslimku ay u abuureen nabad dhab ah oo aduunka badasha, una qabsadeen qalbiyada Muslimiinta iyo kuwa aan Muslimka ahaynba.

7- Caruurtu dadka waawayn ha la fariisato: Waxaa haboon in caruurtu ay dadka waawayn ku dhex jiraan, gaar ahaan marka muxaadaroooyinka Islaamiga ah la qaadanayo. Nabigu (Nabadgalyo iyo naxariis korkiisa ha ahaatee), waxuu inta badan caruurta fariisin jiran safka hore marka uu dadka la hadlayo.

8- U tus in ilmahu qof muhiim ah yahiiin: Arimaha qoyska kala tasho. Ha dareemeen in ay yahiiin xubin muhiim ah oo qoyska ka tirsan; qaybna ay ku leeyahiiin talada wanaagga iyo horumarka qoyska.

XILKAS-XUMO

9- Qoysku waa inuu is raaco: marka aad meel aadaysaan, halkii ay ilmahu saaxiibadood la socon lahaayeen, adiga iyo qoyska ha idinla socdeen (waayo inta caruurta saaxiibadood la socoto, dhaqan xumooyin ayay ka baran karaan). Caruurtaadu ha ku dhexjiraan qoyska iyo saaxiibo wanaagsan oo aad ogtahay in wax xun aanay ka baranayn. Xasuusnow in caruurtaadu ay la midnoqonayso dadka ka agdhow oo ay raac-raacaan. Marka iska jir kuwa ay saaxiibka la yahiin, waxaana sidoo kale muhiim ah inaad ADIGU la socoto caruurtaada.

10- Amaan ilmaha: Amaantu waa arin caruurta aad muhiim ugu ah, khaasatan dadka hortiisa. Caruurta qabkooda ayaa dhisma marka waaridkood dadka hortiisa ku amaano, waxayna isku dayidoonaan inay wanaaggaa sii wadaan. Hase ahaatee, waa in amaantu ku salaysan tahay dhaqamada Islaamka waafaqsan iyo falalka dhaqan wanaagga ah.

11- Ilamaha ha fadeexayn: Sidoo kale, dadka hortiisa ha ku fadeexayn. Caruurta qalad way sameeyaan. Mararka qaarkood waxay qalad sameeyaan, iyaga oo isku dayaya inay waaridka raali galiyaan. Haddii aad caruurta u caraysan tahay si khaas ah kaligood ugu sheeg.

12- Isboortiga: Rasuulku (Nabadgalyo iyo naxariis korkiisa ha ahaatee) waxuu dhiiri galiyay Isboortiyada ay ka midka yahiin dabaasha, orodka iyo fardo-fuulka. Isboortiyada kale ee jirka quweeya, dabcigana dhisa sidoo kale waa wanaagsan yahiin; hase ahaatee, ka taxadar in ayan dhummin anshaxa Islaamka, dhar ku haboon gashadaan, rag iyo dumarna aan la isku dhexdarin.

13- Mas'uuliyad: Kalsooni ku qab in ay caruurtaadu wax qaban karto. Udhiib howlo ku haboon da'da ay ku jiraan. Usheeg inay shaqo muhiim ah kuu qabanayaan, waxaadna arkaysaa iyaga oo isku dayaya inay mar kale ku caawiyaan.

14- Ha halayn: Caruurta si sahlan ayaa loo halayn karaa, haddii la siiyo shay walba oo ay dalbadaan, waxay kaa filayaan inay marwalba waajib kugu tahay in waxay rabaan aad bixiso. Aad uga fakar waxa aad u gadayso. Ka fogow inaad ka badbadiso oo aad galiso raaxo xuduudka dhaafsan. Uwad oo tus qaybaha magaalada ee ay dadka aan cayrta ah ku noolyahiin, si ay u arkaan nimcada ay haystaan.

15- Saaxiibtinimo u dhaqan, laakiin saaxiikood ha noqon: Waxaa inta badan dhacda in reer Galbeedku ay caruurtooda ula dhaqmaan sidii inay saaxiibo yahiin. Islaamka dhexdiisa, taasi macquul ma ahan. Haddii aad waligaa maqashay saaxiibo wada hadlaya, waad garan kartaa waxa ay ka wada hadlaan; hadaba waad ogtahay in sidaasi aanay ahayn sida waaridka iyo ilmahiisu u

XILKAS-XUMO

wada hadli karaan. Adigaa waaridkii ah, waana in ay ku ixtiraamaan, waana inaad taas barto. Saaxiibtinimadu waa inay ku ekaataa in adiga iyo caruurtu ay si kalsooni ah u wada hadli karaan, si ay walwalkooda kuugu sheegtaan ama ay su'aalo kugu waydiiyaan makra ay rabaan.

16– Isla tukada: Ilamaha cibaadada wada sameeya. Marka ay yar yahiin, ha arkaan adiga oo tukanaya. Durbadiiba, waxa aad arkaysaa iyaga oo kugu dayanaya. Salaadda subax u toosi, adinka oo qoys ahna wada tukada (Tani waa mid ay waariddiin badan aanay samayn, waxayna keentay in dhalintu salaaddii iyo cibaadadii ka tagto, waayo, waaridkii ayaa kaligiis salaadda subax masaajidka aadaya, caruurtii oo salaad gaartayna waa iska huruddaa). Uga sheekee waajibnimada iyo abaalmarinta salaaddu leedahay, si ay u ogaadaan muhiimadda.

17- Carrabka ku adkee xalaasha: Ma wanaagsana in marwalba la yiraahdo “kani waa xaaraam, kaasi waa xaaraan”. Inkasta oo lagaa rabo inaad xaaraanta barto, hadana sidoo kale u tilmaan waxa xalaashaa! Si ay u kala gartaan waxa xun iyo waxii ay badalkiisa samayn lahaayeen ee xalaal ah. Islaamka waxaa ka buuxa waxyaabo badan oo xalaal ah, Ilamahaagana u sheeg inay Ilaahay (swt) ugu mahadnaqaan xuduudka uu u gooyay – ee cunada iyo dharka oo kaliya ku ekayn. Usheeg inay mahad ka sheegtaan indhaha ay wax ku arkaan, dhagaha ay wax ku maqlaan, gacmaha iyo lugaha, iyo nimcada ugu wayn oo ah inay Muslim yahiin.

18- Tusaale u noqo: Maadaama aad waarid tahay, waxa aad tahay tusaalaha ugu haboon ee caruurtu ku dayato. Hadii aad waaridkaa si xun ula dhaqanto, caruutaada ka filo inay adigana sidaa oo kale kuula dhaqmayaan. Hadii aad dadka kale aadan xushmayn, caruutaadu way kugu dayanaysaa. Islaamka waxaa ka buuxa waanooyin badan oo xag Rabi (swt) ka yimid oo ku baraya sida caruurta loo barbaariyo. Waxaa waajib waariddiinta saaran ah inay noqdaan Muslimiin wanaagsan, si caruurtoodu ugu dayato. Hadii aadan adigu diinta ku dhaqmin, caruurtaaduna muhiim u arki mayso. Waxay ku noqonaysaa qodobkeenii 6-aad oo ahaa in loo yeelo halyeeyo Muslimiin ah oo ay ku daydaan. Maadaama aad adigu waaridkii tahayna waa in aad noqotaa halyeeygii ugu horeeyay ee ay Islaamka uga daydaan.

GABAGABO

Talooyinkan aan soo koobnay waa dulmar, laakiin waxaa haboon hadii aad rabtid in ilmahaagu aakhiro iyo aduunkaba ku anfacaan, dad Muslimiin ah oo ay bulshadu wanaag ka sheegtana ay noqdaa, inaad fadlan barato casharada iyo buugta diiniga ah ee tarbiyada caruurta ka hadlaya; waa waajib ku saaran! Ujeedada ilmaha loo dhalayana ma ahan tiro ee waa inay noqdaan kuwo tayoleh, si ay kuu anfacaan aakhiro iyo aduunkaba. Maanta waxaa badan dadka carabka ku dhufta tirada caruurtooda, iyaga oo inta badan hilmaama in tayaduna muhiim tahay! Caruurtu

XILKAS-XUMO

waa amaano Ilaahay (swt) noo dhiibay. Waxaan ku barbaarin karnaa inay noqdaan dad Muslimiin ah oo sharaf leh, ama waan dayici karnaa oo waxaan ka dhigi karnaa dad aan wax qiimo iyo sharaf ah lahayn, oo diinta, bulshada iyo magaca qoyskaagaba fadeexo ku ah. Muhiimnimada waaridku intaas ayay le'eg tahay. Mas'uuliyaddaasi Aabaha iyo hooyadaba waa saaran tahay, oo ma ahan mid hooyada ama aabaha oo kaliya lagu halaynayo. Caruurta ay dhaleen waariddiin tarbiyadda saxda ah yaqaana waxaa la gartaa marka ay bulshada soo dhexgalaan; halka kuwa waaridkood dayacay oo aan wax aadaab ah la barin ay bulshadu ka dayriso.... Hadaba walaal, maanta bilow inaad mas'uuliyadda Ilaahay (swt) ku waydiindoono aad ka soo baxdo! Hadii qoys walba caruurtiisa ku dadaalo, waxaa soo baxaya bulsho hagaagsan, taasina waxay dhalaysaa Ummad Muslimiin ah oo hagaagsan.

“Caruurtu waa nimco Ilaahay ku siiyay ee si wanaagsan u dhowr!”

XILKAS-XUMO

Dhaawicidda Mooraalka Caruurta Iyo Dhibaatooyinka Ay Ka Qaadaan!

Ilmuhu waa hadiyad qaali oo Ilaahay bixiyo, waxuu ubaahan yahay in la ilaali mooraalka iyo dareenka maskaxdiisa. Dadka iyo bey'ada ku xeeran ilmaha ayaa ugeysan kara mooraalkiisa dareen ku dhisan dhaawac oo la dhibaatooda. Xasuusta iyo maskax ku haynta ilmuhu waa mid in badan kabadan midda dadka waaweyn. Dhaawaca soo gaara maskaxdiisa ayaa saameyn balaaran ku yeesha koriimadiisa iyo la dhaqankiisa bulshada. Ilaalinta maskaxda ilmaha ayaa ah mid waajib ah maadaama ay saameynteedu aad u darantahay.

Dhaawacaan ayaa noqon kara mid ay sababeen dadyow kala duwan kuwaasoo saameyn ku leh ladhaqanka iyo koriimada ilmaha. Waxaa kamid ah dadka dhaawaca u geysan kara maskaxda iyo mooraalka ilma, waalidiinta, macalimiinta, caruurta kale, burcadda sida xun uga ganacsata caruurta iyo waxyaabaha deegaanka ku xeeran sida isticmaalidda daroogada. Canaanta joogtada iyo hoos udhigada awooda ilmuhu waxay ku keentaa dareen ku xambaarsan shalayto iyo inuu noqdo mid aan lahayn kalsooni ku filan lana nool cabsi joogta ah. Ilmaha la nool waalid aad u dabeecad kulul ama wax kabarta macalin aaminsan dilka iyo canaanta ilmaha, waxuu noqon karaa mid aysan maskaxdiisu u qaangaarin sida caruurta kale ee la filka ah.

Hababka loo dhaawaco mooraalka ilmaha ayaa waxaa kamid ah, cayda, canaanta, dilka, ugu yeeridda magacyada ama naaneysaha uusan jeclayn, markhaati uga dhigida xaalado uusan u adkaysan Karin sida ciqaabta dilka ama dagaaladda. Ilmaha ay kala tageen ama isfureen labadiisa waalid ayaa laga yaabaa in mooraalkiisu ay wax iska badalaan maadaama uusan haysan naxariista labadiisa waalid oo wada jirta.

Cilmi baaris la sameeyey ayaa lagu ogaaday in kabadan 80 million oo caruur ah loo geysto dhaawaca mooraalka sanad walba meelo kala duwan oo kamid ah dunida. Caruurta ku nool wadama faqriga ah ama la nool waalidiinta uu hooseeyo dhaqaalaha soo gala ayay warbixintani cilmi baarista ah sheegtey inuu mooraalku hooseeyo aysana u fakirin sida ciyaalka kale ee iyaga la filka ah.

Astaamaha ay dareemaan caruurta loo geysto dhaawaca mooraalka ayaa waxaa kamid ah, inay noqdaan kuwo ka cabsada sheegida waxa ay u baahanyihiin, nebcaanshaha magacyada ama naanaysaha loogu yeero, isla hadal joogta ah, fakar, cuqdad iyo dabeecad xummo.

XILKAS-XUMO

Mooraalka oo la dhaawaco ayaa ugu danbeyn keenaya inuu ilmuhu noqdo mid aysan hagaagsanayn waxbarashadiisa, mid lanool walwal lagana yaabo inuu nafsadiisa halis galiyo sida inuu is daldalo, inuu noqdo mid gala danbiyo isagoo ka falcelinaya sida ay ula dhaqmaan waalidka ama dadka noloshiisa ku taxaluqa iyo in maskaxdiisa ay marwalba kusoo noqnoqdaan oraahyada ama erayada dhaawaca ugeystay taasoo uga sii dareysa xaaladiisa caafimaad ee maskaxda.

See loo yareyn karaa ama loo joojin karaa dhaawicida mooraalka ilmaha

Jawaabta su'aashaan ayaa ah mid leh faa'ido aad ubalaaran maadaama ay hal meel kusoo uruurinayso qofobada lagama maarmaanka ah ee joogteynta iyo ilaalinta mooraalka ilmaha. Waxaa aan shaki kajirin in waalidka ugu fiican ay marmar canantan ama dhaawici karaan mooraalka ilmu, waana lagama maarmaan in marwalba sasabida ilmuhu ay noqoto qodobka ugu danbeeya ee lagu saxayo khaladka loo geysto. Ilmaha oo laga ilaaliyo waxyaabaha balwada ah ee uu leeyahay aabuhu sida sigaarka iyo qaadka waa mid kor u qaadi karta fakarkiisa iyo fahamkiisa nololeed. Waxaa lagama maarmaan ah in ilmaha laga yareeyo canaanta, cayda iyo magacyada uusan jeclahan. Ilmaha oo laga farxiyo lana siiyo wax uusan filanayn waqti uusan filanayn ayaa kor u qaadi karta kalsoonida iyo jacaylka uu uqabo waalidkiisa.

Waalidiinta ayaa noqon kara qodobka koowaad ee kor loogu qaadayo mooraalka ilmaha, waxaa kamid ah in mararka qaarkood ay u sheegaan wax qoyska dantiisa ah si uu ra'yigiisa ugu darsado xataa hadii aysan waxaasi jirin, tan ayaa siyaadin karta xal uhelida maskaxdiisa mashaakilo fara badan. Dardaaran iyo tallada ay ilmaha siiyaan macalimiintisa iyo dadka ka waaweyn ayaa ah mid wax weyn kusiyaadisa fakarkiisa iyo hiigsigiisa nolosha. Inkastoo aysan wanaagsanayn in la dhaawaco mooraalka caruurta ayaa waxaa dhici karta in markii uu ilmuhu koro, maskaxdiisa iyo mooraalkiisu noqdaan kuwo ka bogsada daanooyinkii loo geystay.

XILKAS-XUMO

SHEEKO

Caawinaad ilmaha caqabada neerfo maskaxeedka

Qoysu wuxuu ka kooban yahay hooyo, aabe iyo labo wiil. wakhtiyadii danbe wiilashii ayaa caqabad qabsatey. Wiilashii midkood ayaa dhibaato xaga foojignaanta qabsatey wuxuuna noqdey mid si sahalan ugu dagaalama iskuulkii. Macalimiintii iyo anshax dhowraha iskuulkaba waxay u yeereen waalidkii si ay ugala hadlaan waxayna soo jeediyeen iney wadajir ula xiriiraan daryeelka arrimaha bulshada. Waalidku markii hore waxay ka qabeen shaki masuuliyiinta, balse si dhaqso ayey waxay ku arkeen in, daryeelka bulshada, daryeelka caafimaadka iyo iskuulkiiba ay u heleen qaab lagu caawiyo qoskii oo dhan.

Walwalka waalidka ee ubadkooda

Reerku waxay galeen labo geedi wakhti yar guduhiis iyagoo u guurayey shaqada aabaha dartiis. Aabuhu wuxuu shaqeeya gelingelin inta badana ma joogo guriga. Wiilka yar waa 6-jir wuxuuna guriga la joogaa hooyada. Waxaa fuuley miisaan/cayil waxaa kamaqan rabitaan sameynta barashada arrimo cusub. Wiilkii wuxuu ku fikirayaa inuu kuwa kale kaliito mana rabo tusaale inuu barto wadista baaskiilka.

Walwal badan ayaa waalidkii kasoo wajahay wiilka 11-jirka. Dhigashadii iskuulku ma wanaagsana. Waxbarashadana uma foojigna waxaana ku adkaadey inuu waxbarto. Geediga iyo iskuulka loo wareejiyey waxay sii adkeysey xaaladiisa.

Waalidkii ayaa laga codsadey iney wadahal ugu yimaadaan macalinka iyo anshax dhowra iskuulka. Waxay soojeediyeen in wiilka baaris loo diro. Hooyadu waxay aaminsaneed iney iyada tahay qofka sida fiican u fahmaya waxa wiilkeedu u baahan yahay. Wadahadal kadib waalidkii waxay aqbaleen, in cilminafsiga iskuulku uu gudbiyo wiilkii kadibna wuxuu heley baaritaan.

Dhibaato xal baa loo helaa

Baaritaankii caafimaad ayaa waxaa lagu ogaadey in, wiilka iney jirto caqabad caadiya oo dhanka kobaca neerfayaasha, taasoo lagu sheegey Aspergerin oireyhtymä/ cuddurka Asperger. Sababtaas

XILKAS-XUMO

ayaana keentey in wiilkii qaaab dhaqameedkiisu noqdey mid ka duwan kuwa kale, waxayna sababtey qalad fahan iyo isku dhac isaga iyo ardeydii iskuulka la dhiganeysey. Wiilku ma garaneyneyn qaabkuu dareenkiisa ku muujin lahaa xaalada dhibaato ee heysata inuu gacan qaado mooyee. Waalidka waxaa loo sheegey in, ay muhiim tahay siduu wiilku waxbarsho u helo una barto qaab kale oo uu dareenkiisa ku muujin karo ee uusan feer wax ku muujin.

Reerkii waxaa loo direy si uu caawinaada uu wiilku u baahan yahay nolol maalmeedkiisa in laga diyaariyo neerfaha maskaxda neuropsychiatriseen (NEPSY), waalidkiina loo sheego qaabka ay ku caawin lahaayeen wiilkooda ama ay ku hagi lahaayeen. Wiilkii wuxuu heleyaa tababare nepsy oo 10 jeer tababara. Sidoo kalena waalidka waxaa lagula heshiiyey in wadajir loo waco daryeelka arrimaha bulshada si loo weydiiyo caawinaadaha kale ee ay qoysku heli karaan xaaladan ay ku jiraan.

Reerkoo idil baa la caawinayaa

Adeega arrimaha bulshada ayaa waxay u soojeediyeen waalidkii in qoyska lagu soo booqdo guriga oo lala sheekeysto. Wadahadalkaasna waxaa looga dhageysanayaa qoyskii baahidooda, hooyadiina waxay sheegtey in ay daashey. Hooyada aad bey u farxadgelisey markey dareentey sooshalku iney qoyska dhan daneynayaan xaaladooda iyo sidii ay ku caawin lahaayeen wiilka yar. Waxaa loo sameeyey qorshe qiimeyn waxay u baahan yihiin, waxaana lagu heshiiyey reerka lagu caawiyo adeegaha qoyska.

Adeegaha qoyska ayaa markiiba billaabey inuu tako hoygii qoyska isbuuc walba. Waxay ka caawineysa sidey u xakameyn lahaayeen wiilka qaab dhaqameedkiisa sameeyaana sida tababaraha nepsy kula taliyo. Wiilka waxaa sidoo kale laga taakuleynayaa dhigashada iskuulka, wakhti yar kadibna waxaa wanaagsanaatey iskuul dhigashadiisa. Wiilkii wuxuu bartey la dhaqanka ardeydii kale.

Wiilkii yaranaa wuxuu bilaabayaa fasalkii tarbiyada hore esiopetus. Labo billood kadib wiilkii wuxuu sheegey, inuu rabo inuu barto wadista baaskiilka si uu saaxibadiisa fasalka ula kaxeysto baaskiil. Waalidkiina culeys baa ka degey in, dhibaataadii loo heley xal. Waalidkii waxay go'aansadeen iney fasax dalxiis ah dalbadaan. si waalidkuna wakhti isugu helaan.

CUTUBKA 5:AAD

MASUULIYADDA

MASUULIYADDA

Waa maxay masuuliyaddu?

Mas’uuliyaddu waa hannaanka ugu wanaagsan oo ey nafi dastuur ka yeelato. In aad mas’uuliyad muujiso ayaad ku gaari kartaa dhammaan waddooyinka guusha. Taas caksigeeda waa qeyrul-mas-uulnimada, oo ah dayacaad iyo beylah ka dhalato fiirsasho la’aanta.

Qofka masuulka ah, waa mid ka dhax muuqdo bulshadiisa, magacna ku leh. Waa mid iyo had jeer feejigan kana digtoon waxyaabaha aan natiijadooda la mahdineynin. In yarba Alle ha ka dhigee, mas’uuliyad marka ey kugu jirto, waxaad tahay qof sabar leh, waxaana kuu fududaata waxyaabo badan, oo dadku culeys u arkaan.

Ninka Oromada ah ayaa markuu qaangaaro, waxaa loo kala dooraa laba arrimood, oo kala ah;

A. Inuu shan sano gaajo ku noolaado, waxii daqli ah ee soo galana u aruuriyo mustaqbalkiisa.

B. Iyo inuu waligiis gaaja ku noolaado, oo noloshiisa, uu cariiri ku dhammeysto.

Tan danbe ayuu ku tawakalaa, waa haddii ey mas’uulnimo ku jirto.

Mas’uulnimaddu waa garaadka iyo caqliga oo la raaco. Waa kala saarasho xaqiiqada iyo qayaaliga, oo si hufan loo kala ogaado. Waxaa ka mid ah; go’aanqaadashada, qofku hadduu go’aan qaadan karin, mas’uul ma noqon karo!

Diinta islaamku in badan, ayey ka hadashay mas’uuliyadda. Waxaa jiro xadiisyo iyo Aayada badan oo ku soo arooray. Sida xadiithkii ahaa; “Nin walbo raciyadiisa ayuu ka mas’uul yahay, kan arijirka ariga ayuu ka mas’uul yahay” oo waa inuu ka ilaaliyaa dugaagga, darayada Iwm

Xilligii Nabi Daa’uud uu arlada ka talinayay, ayaa waxaa u soo dacwootay, beeralleey manfacoodii ari ka daaqay. Nabi Daa’uud waxuu xukmiyay, in dadka beerta laga daaqay, badalkeedi ariga u qaataan. Wiilkiisii Suleman oo goobjoog ahaa, ayaa isaguna markiisii ku hadlay wax uu Eebbe ku ilhaamiyay, maadaama uu laftiisu Nabi noqon doono Waxuu uu weydiiyay su’aal mas’uuliyad ka muuqato, oo aheyd; “Ariga hadduu beerta daaqay maalin cad, waxaa qaladka iska leh ninka beerta leh, oo dayacay maalkiisii,

XILKAS-XUMO

haddii uuse habeen daaqay, waxaa qaladka iska leh ninka ariga leh, oo dayacay mas'uuliyaddii ka saarneyd xoolihiisa” haddaba, waxaa la ogaaday in arigu habeen uu beerta daaqay, markaasuu Nabi Suleyman xukunkan riday.

dhaqanayaan, kuwa ariga lahaana beerti ayey tacbayaan, marki ey beerti sidii ey aheyd ka dhigaan, ayaa arigoodii loo soo celinayaa, beertana lagu wareejinayaa dadkii lahaa.

Haddaba, mas'uuliyaddu ma aha wax la dhayalsan karo, haddey naftaada noqon laheyd ama dadka iyo dalka aad mas'uulka ka tahay. Sidaasoo kale ayey diintuna mas'uuliyad kaa saran tahay, Xadiith baa ahaa; “Ilaahey waxuu ugu jecel yahay, qof howl qabtay, oo howshiisii si hufan u gutay”.

(WALIGAA MASUULIYAD MUUJI)

Masuuliyada Waalidka

Maxay ku dhacday in dadka waaweyni hilmaamaan waxay tahay ilmanimadu? Iyaguba marbay yaraayeene.’

Cayaartu waa midda ugu muhiimsan baahida ilmaha. Waxa ugu muhiimsan ilmaha waa cayaarta. Waana cayaarta waxa carruurta ku hellaan waxbarashadooda.

Cayaartu waxay shidaal u tahay horumar caafimaad qaba.

Orodka, laadida iyo tuurida kubbadu waxay carruurta ka caawintaa isku dheelitirnaanta iyo wadashaqaynta jirka.

Gaymamka iyo heesida iyo qaafiyadu waxay caawintaa koritaanka luqada.

Gaymamka xalinta xisaabaadka iyo xujadu waxay caawimaan koritaanka garaadka ilmaha.

Kala-sugida iyo wadaagida cayaarta waxay ka caawintaa korinta xirfada cilaqaadka muhiimka ah iyo is-xakamaynta.

Cayaartu waa hab muhiima oo carruurta ku muujin karto dareenkooda. Daawashada iyo ka mid noqoshada cayaarta carruurta, waxaad ku ogaan kartaa sida carruurtaadu dareemayaan iyo waxay ka fekerayaan.

Waalidku waxay door muhiima ka cayaaraan cayaarta carruurta

La wadaagida cayaarta waxay dhistaa cilaqaad wanaagsan oo u dhexeeya adiga iyo ilmahaaga jawi cayaareed.

La cayaarida ilmahaaga waxay kor u qaadaa fursadaha aad ku caawimayso ilmaha marka ilmuhu la qabsanayo xirfadaha cusub. Mida ugu qiimaha badan oo meelmarinta ilmuhuna helli karo waa ogolaanshaha iyo qadarinta waalidka.

Cayaarta ugu fiicana ee ilmuhu waa mida uu la cayaaro waalidkiis - isku day inaad waqti siiso ilmaha maalin walba. La cayaarida carruurta

Cayaartu waa inay ahaataa mid ku haboon heerka ilmaha. Hadday sahlan tahay waxaa laga yaabaa in ilmuhu ku caajiso. Hadday aad u adag tahayna waxaa laga yaabaa inuu ku wareero.

XILKAS-XUMO

Ilmahaagu ha hogaamiyo cayaarta. Ha la wareegin.

Xaqiiji in cayaartu amaan tahay.

Weydii ilmahaaga qaybta cayaarta ee uu jeclaan lahaa inuu cayaaro.

Ogollaw waqti ku filan oo ilmuhu ku cayaaro.

Ha la tartamin ilmahaaga. Taasi waxay ka niyad jebinaysaa inay kula cayaaraan.

Sabur haddii ilmahaagu doonayo inuu ku celiyo isla cayaartii mar kale. Xirfadaha cusubi waxay u baahan yihiin ku celcelin. Xamaasada ha lumin.

Soo dhoway oo qadari dadaalkooda, iyada oo aan ku xirnayn waxa ka soo bixi kara.

Raadi fursado aad mar walba cayaar ugu samayn karto. Masalan, la wadaag ilmahaaga samaynta qaafiyad ama heeso ku saabsan xarakaadyada maalmeed sida goglida sariirta.

Marka wax kasta oo kale laga yimaado la cayaar lana qosol carruurtaada.

Waa maxay masuuliyada ardaydu?

Ardayda waa inay ula dhaqmaan si xushmad iyo ixtiraam leh macalimiintooda & xubno kale. Waa inay ahaadaan kuwo si fiican loo edbiyo oo aan ahayn dugsiga, fasallada, laakiin sidoo kale meel kasta. Waa inay dugsiga ku aadaan waqtigii loogu talagalay oo ay ilaaliyaan wakhtiga ku habboon inay fasallada ku soo xaadiraan wakhtigooda si joogto ah.

Maxay yihiin 5ta xuquuqul insaanka ee aasaasiga ah?

Xuquuqul insaanka waxaa ka mid ah Xuquuqda nolosha iyo xorriyadda, xorriyadda addoonsiga iyo jirdilka, xorriyadda ra'yiga iyo ra'yiga, xaq shaqo iyo waxbarasho., iyo qaar kaloo badan. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay xuquuqahan, iyadoon la takoorin.

Waa maxay waajibaadka iyo mas'uuliyadaha saaran qof kasta?

Dadka oo dhami waxa ay xil ka saaran yihiin ilaalinta hawada, biyaha iyo ciidda dhulka, si ay u helaan dadka hadda deggan iyo jiilasha soo socda. Qof kastaa wuxuu leeyahay a masuuliyada ah in uu u dhaqmo si daacadnimo, daacadnimo iyo cadaalad ku dhisan. Qof ama koox waa in aysan dhicin ama si aan loo meel dayin hantidooda uga qaadin qof kale ama koox kale.

Musuqmaasuq.

Musuqmaasuqu waa habdhaqan aan daacad ahayn oo ay ku dhaqmaan Dadka qaar. Sida Kuwa ku takri-fala Awoodooda Ama masuuliyada ay haayaan sida madaxda Ururada, Ganacsatada iyo Dowawlada.

Musuqmaasuqu wuxuu keeni karaa falal kala duwan, oo ay ku jiraan bixinta ama qaadashada laaluush, hadiyado aan munaasib ahayn, laba-la macaamilood,(laba-kaarle) wax-kala-iibsi miiska hoostiisa ah, is-daba-marinta doorashooyinka, leexinta iyo dhaqida lacag.

Hab-dhaqanka musuqmaasuqa ayaa inta badan ka dhasha faragelinta dawladda ee dhaqaalaha, balse waxa lagaga hortagi karaa hubin iyo dheelitirnaan gaar ah.

Waxaa jira qaaba badan Oo musuqmaasuqu loogu lug yeelan karo , sida,shaqsi, shirkad, Ama dawlad.

Tusaale ahaan.

Siyaasiga oo laga yaabo in uu musuq-maasuqay lacag uu ku ku bixiya codbixinta doorashada.

Shirkad Oo laga yaabaa in ay musuq maasuq sameeysay si ay saameyn ugu yeelato suuqa.

Dawlada oo loo aqoonsan karo inay musuq-maasuqday dhaqaalaha, sida cashuur-dhaaf iyo I.W.M.

Dhibaatooyinka Musuqmaasuqa.

Dhibaatooyinka ka dhasha musuqmaasuqa waxaa ka mid noqon kara warbaahin Aan la jeclayn. Iyo burburinta hanaanka wanaagsan Ee Maamul wanaaga Dowlada ,sidoo kale waxay hoos u dhigi kartaa kobaca iyo horumarka (dhaqaalaha), waxaayna meesa ka saari kartaa shuruucda iyo qawaaniinta , waxaana abuurma kara caqabado fara badan, Oo ugu dambeeyn sabab, in kalsoonidii ay meesha ka baxdo.

CODSI

Akhristaha halkaan ila Soo garayow ahmiyad gaara Ayaad ii leedahay.

Marka hore Alle waxaan kaaga baryayaa ajar aanla Soo koobi Karin inuu kaasiyo.

Marka labaadna waxaan codsanaa wixii khaladaad sixid u baahan oo aad ku aragtay dhiganahaan inaad igula Soo wadaagto:

Marka saddaxaadna waad ku mahadsantahay akhrinta buugaan inala wadaag waxa aad ka faa'iday buuggaan amaba aad ku darsan karto oo fikir ah.

XILKAS-XUMO

Gunaanad

Dhammaan akhristayaasha buuggaan xilkasxumo waxa aan marka hore umahadnaqayaa allaah, oo suurtagaliyey bilaw ilaa dhamaad buuggaan qoristiisa, marka xigana waxa aan u mahadqayaa akhristayaasha buuggaan maadaama aad ku bixiseen akhrinta buuggan in ka mida waqtigiina iyo juhdigiina.

Waxa aan filayaa in aad kawada heli doontaan uuna aad idin anfici doono sida ku xardhan magaca buugga Xilkasxumo, qorista Buuggan waxa ay ku timi maadaama ay marar badan igu soo laablabteena waxyaalo iskasxuma ah waliba bushadeena dhexdeeda.

Haddaad wax rayi aad ilawadaageyseysid ama meelo qaar ay kaa soo jiiteen Buuggan igala soo xidhiidh.

Email:hassannoorstar@gmail.com

XILKAS-XUMO

DHAMAAD